GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

# SOOJEEDINTA

## WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA KMG AH.

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**ANSIXIYEY:**
GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

FEBRAAYO, 2024

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka**

**جمهورية الصومال الفدرالية**
**لجنة المراجعة ومراقبة تنفيذ الدستور**

**Federal Republic of Somalia**
**The Constitution Review and Implementation Oversight Committee (OC)**

Ref: GLD/BFS/....../02/2024 TAR: 10, Febraayo 2024

**Ku:** **Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**
**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS**
**Og:** **Wasiirka Wasaaradda Caddaalaadda iyo Arr. Dastuurka, XFS**
**Og:** **Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.**

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS wuxuu si waafaqsan Qodobka 133(10) ee Dastuurka KMG, Qodobka 108aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 1(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG iyo Warbixinta la socota.

Soojeedimaha cutubyadan waxaa soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waxaana ansixiyey Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, iyo Qodobka 3(1)(2) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Mudane Guddoomiye, Guddigu inta uu ku guda jiray diyaarinta soojeedimahan, waxay hay'adaha u xilsaaran dib-ueegista dastuurka latashi la sameeyeen culumada soomaaliyeed, si guddiga uu u dhageysto talooyinkooda iyo fiirooyiinka ku aaddan wax-kabeddelka cutubyadan.

Ugu dambayn, Mudane Guddomiye, guddiga wuxuu diyaar u yahay inuu dhagaysto tallooyiinka iyo fikradaha xildhibaannada labada Aqal ee BFS ee ku aaddan wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah, si waafaqsan Qodobka 4(1) ee ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Iga guddoon salaan iyo qadarin

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf 'Xuseen Iidow'
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka BFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

**Lifaaqyo:**

1. Soojeedimaha Wax-Kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka KMG ah
2. Warbixin Faahfaahineysa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah.

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.s, oc@parliament.gov.so | website: www.dastuurka-bfs.so

**Summad:** GMDHD/GG/131/24

**Taariikh:** Febraayo 8, 2024

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka

Ujeeddo: Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD", waxaa sharaf u ah in si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 3(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta wax-kabeddelka Dastuurka, uu halkaan kuugu soo gudbiyo soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota.

GMDHD oo tixraacaya warqadaha ku kala taariikhsan 26/7/2023 iyo 25/12/2024 oo dhammaantood aad ku soojeediseen taallooyin iyo in la sameeyo cilmibaarisyo dheeraad ah iyo latashi culimmada soomaaliyeed, iyo kulamadii dhowrka ahaa ay wada yeesheen labada guddi, wuxuu cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafay fiirooyinka Guddiga Lasocodka iyo talooyinka culimmada Soomaaliyeed, sidoo kale wuxuu soo diyaariyey daraasad iyo cilmibaarisyo ku abbaaran cutubyadan sida aad ka arki doontaan warbixinta guud ee la socota soojeedimaha.

Ugu dambeyn, GMDHD waxaa u sharaf ah in soojedimaha wax-kabeddelka dastuurka cutubyadiisa 1aad ilaa 4aad iyo warbixinta la socota loo gudbiyo labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
INDEPENDENT CONSTITUTIONAL REVIEW AND IMPLEMENTATION COMMISSION

**Lifaaqyo:**

(1) Soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah; iyo
(2) Warbixin faahfaahineysa soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah

## ARAR

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) wuxuu diyaariyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee asalka Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kadibna Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka ayaa ansixiyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad. Warbixintu waxay ka koobantahay saddex qaybood oo kala ah: ***(a)*** Dastuurkii asalka ahaa oo ku qoran dhanka (bidix);***(b)*** Soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS oo ku qoran dhanka (dhexda); iyo ***(c)*** Faallo tilmaamaysa is-beddellada la soojeediyey iyo sababaha loo cuskaday oo iyadana ku qoran dhanka (midig).

| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS** | **Faallo:** |
|---|---|---|

GMDHD wuxuu diyaariyey warbixin kale oo faahfaahin mug leh oo wadata cilmibaarisyo islamarkaasna bixinaysa tusaalooyin dalal kale haddii loo baahdo. Waxaa kale oo la xusi doonaa haddii ay jiraan heshiisyo caalami ah oo ay Soomaaliya qayb ka tahay oo saamayn ku yeelan kara qaabka loo qorayo soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

# CUTUBKA 1AAD:
# BAAQA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Cutubka koowaad wuxuu ka kooban yahay sagaal qodob (9) si la mid sidii asalka Dastuurku uu ahaa, waxaana toosin lagu sameeyey dhammaan qodobbada iyo 21 faqradood, waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyey sagaal (9) faqradood oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Sidoo kale waxaa la tiray laba (2) faqradood oo ku jirtay asalkii Dastuurka. Axkaamta lagu soo kordhiyey waxaa ka mid ah "Reebbidda diin cayga, u hoggaansanka Dastuurka iyo xeerarka dalka, dareyeelka iyo ilaalinta horumarinta afka Soomaaliga iyo suugaantiisa".

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu diyaariyey saddex xulasho oo faahfaahsan ku saabsan maqaamka caasimadda.

| CUTUBKA KOOWAAD<br>BAAQA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS** | **Faallo:**<br>Faalladan waxay tilmaamaysaa isbeddelka ku yimid asalka Dstuurka KMG ah, oo noqon kara kaabid, toosin, tirtirid, ayadoo faahfaahin ka bixinaysa asbaabta keentay in wax-kabeddelkaas la sameeyo. |
| **Cutubka Koowaad:<br>Baaqa Jamhuuriyadda Soomaaliya** | **Cutubka Koowaad:<br>Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Waxaa lagu kordhiyey ereyga "Federaalka" |
| **Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Soomaaliya** | **Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Waxaa lagu kordhiyey ereyga "Federaalka" |
| (1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matilaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed. | 1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaali ah, oo Muslim ah, lehna gobannimo, ku saleysan caddaalad iyo sarraynta sharciga. | Qodobka 1aad faqraddiisa (1) ee asalka waxay si isku dhafan uga hadleysay qiyamka iyo arrimo kale oo ay ku dhisan tahay JFS. Haddase, waxaa loo kala dhigay laba dhigood : faqradda (1) oo lagu qeexay haybta Jamhuuriyadda iyo qiyamka, waxaana lagu kordhiyey ereyga "Muslim ah" iyo "sarraynta sharciga" |
| | 2) Soomaaliya waa Jamhuuriyad dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, loo dhan yahay kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee soo dhoweyneya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub**<br>Faqradda (2) oo siiqeyn lagu sameeyeyna waxaa lagu xeeriyey arrimo muhiim ah oo ay JFS ku dhisan tahay, waxaana lagu kordhiyey "si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". |
| (2) Allahu Subxaanahu wa Tacaalaa ka sokow (SWT), awoodda oo dhan waxa leh Shacabka, wuxuuna ugu isticmaalayaa si toos ah iyo isagoo u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si | 3) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, asagoo awooddaas u | Faqraddan waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn, ayadoo loo qoray si qaanuuni ah. Qaybta labaad ee faqradda 2aad ee asalka dastuurka waxaa laga dhigay faqrad gaar ah |

| | | |
|---|---|---|
| waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda. Waxaa reeban in qof ama qayb ka mid ah bulshada sheegato gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ama u adeegsadaan si u gaar ah. | isticmaalaya si toos ama si dadban, u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | oo noqoneysa faqradda 4aad, sababta looga jaray waxay tahay in loo baahan yahay kala qaadista labada axkaam ee ku qoran faqradda 2aad ee Asalka Dastuurka.<br>Waxaa lagu kordhiyey " Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, " ama si dadban", iyo "Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". |
| | 4) Waxaa reebban in qof ama qayb ka mid ah shacabka Jamhuuriyadda ay sheegato ama la wareegto xaqa lahaanshaha gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama isticmaalkeeda si u gaar ah. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waa mid laga soo jaray qaybta labaad ee faqradda 2aad ee qodobkan asalka Dastuurka, waxaana laga dhigay faqrad cusub, oo noqoneysa faqradda 4aad ee qodobkan.<br>**FG:** Fadlan eeg faallada ku xusan faqradda 3aad ee soojeedinta qodobkan. |
| (3) Gobannimada iyo midnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma-xadgudbaan. | 5) Gobannimada, madaxbannaanida, midnimada qaranka iyo xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xadgudbaan. | Ayadoon waxba laga beddelin nuxurkii faqradda 3aad ee asalka Dastuurka, waxaa lagu soo kordhiyey ereyada, "madaxbannaanida, qaranka iyo xuduudaha". |
| **Qodobka 2aad:<br>Dawladda iyo Diinta** | **Qodobka 2aad:<br>Diinta Dalka** | Cinwaanka waxaa loo beddeley "Diinta Dalka" |
| (1) Islaamku waa Diinta Dawladda. | 1) Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | Faqradda 1aad, waxaa la beddelay ereyga "Dawladda" laguna beddelay ereyga "dalka" maaddaama diintu aysan ahayn diinta dawladda oo kaliya, sidoo kale siiqo toosin ayaa lagu sameeyey. |
| (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka. | 2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 2aad siiqo toosin ayaa lagu sameeyey. Ereyga "Dalka" waaxaa lagu beddelay "Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" |

| | | |
|---|---|---|
| | 3) Waxaa reebban cayda diinta Islaamka, karaahiyaddeeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta Islaamka. Qofkasta oo u gafa diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay faraysaa in ay reebban tahay cayda diinta islaamka. GMDHD wuxuu sameeyey daraasad la xiriirta diin-nacaybka iyo sida loogu daro dastuurrada iyo xeerarka.<br>Daraasad dheer kaddib iyo xulushooyinka laga sameeyey cutubka ugu habboon ee lagu soo kordhin karo faqraddan. GMDHD wuxuu u arkay in ay habboon tahay in cutubkan lagu daro. Sababta loogu soo daray faqraddan ayaa ah in laga helo Dastuurka dhexdiisa, faqrad mamnuucaysa cayda Islaamka, si loo xoojiyo, loona dhowro xushmada iyo muqaddasnimada diinta Islaamka. |
| (3) Lama soo saari karo sharci aan waafaqsaneyn Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqaasiiddeeda. | 4) Lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn Shareecada Islaamka iyo maqaasiiddeeda. | Faqradda 3aad, Ereyga "sharci" waxaa lagu beddelay "xeer". Waxaa la tiray ereyga "mabaadii'ada", maaddaama mabaadii'da Shareecaddu ay farabadan tahay oo aysan ahayn mid kooban oo cayiman, ayna keeni karto baahsanaaan tafsiireed oo ku saabsan mabaadii'da. |
| **Qodobka 3aad:<br>Mabaadii'da Asaasiga** | **Qodobka 3aad:<br>Mabaadii'da Aasaasiga ah** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada Nabigeenna Muxammed (NNKH), wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda (ujeeddooyinka) shareecada iyo caddaaladda bulshada. | 1) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Nebi Muxammad (NNKH), wuxuuna ilaaliyaa Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda. | Waxaa la tiray ereyga "cadaalad bulshada" maaddaama lagu arki doono meelo kale. Sidoo kale waxaa lagu daray kaddib ereyga "Jamhuuriyadda Federaalka". |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka. | 2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Muslim ah oo ka mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka. | Faqraddan sideeda aya loo qaatay, ereyga “Islaam” waxaa lagu beddelay “Muslim”. |
| (3) Mabaadi’da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan yihiin mabaadi’da asaasiga ah ee awood qaybsiga Nidaamka Federaalka. | 3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi’da asaasiga ah ee nidaamka awood qaybsiga federaaliga ah. | Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin, laakiin siiqada ayaa la toosiyey. |
| (4) Dastuurka Soomaaliya wuxuu Dhiiragelinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalamiga ah, caddaaladda, xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbanaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha. | 4) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ilaalinayaa xuquuqda aadanaha, talinta sharciga, xurmaynta xeerarka caalamiga ah oo aan ka hor’imaaneyn shareecada islaamka iyo Dastuurka, xoojinaya dawlad loo dhan yahay, kala soocidda awoodaha xeer dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbannaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan, daahfurnaan, hufnaan, kana jawaabaya danaha dadweynaha. | Faqraddan 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, laakiin waxaa loo qoray siiqa qaanuuni ah, ayadoo lagu daray ereyada: “Ilaalinayaa, xurmeynayaa, xoojinayaa iyo daahfurnaan”.<br><br>Waxaa la tiray: “dhiirigelinayaa iyo shuruudaha guud”. Sidoo kale, waxaa lagu daray “Jamhuuriyadda Federaalka” |
| (5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan hay’adaha guud ee qaranka, si wax-ku-ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo ee saddexda laamood ee Dawladda iyo Guddiyada Madaxbannaan ee qaranka. | 5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay’adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose si wax-ku-ool ah, lana sugo gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo. | Faqraddan 5aad nuxur ahaan waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu sameeyey toosin siiqo. Waxaa lagu daray: “heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose” iyo sidoo kale “lana sugo”. |
| | 6) Awood dawladeedka heer kasta waxaa loo adeegsan karaa oo keliya si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub**<br>Sababta Faqrad 6aad loogu kordhiyay ayaa ah in hay’ad kasta oo dawladeed ay awooddeedu ku xaddidan tahay inta Dastuurka iyo xeerarka dalku ay siiyeen. |
| | 7) Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka | **Faqrad cusub** |

| | | |
|---|---|---|
| | Jamhuuriyaddu wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. | Waxaa laga soo raray Cutubka 3aad Qod. 43 (1) ee Dastuurka, waxaana lagu daray "badda", hawada" iyo "Kheyraadka dabiiciga". Iyadoo loo arkay in ay tahay mabda' asaasi ah, kuna habboon tahay in lagu daro Qod. 3aad oo ka hadlaya mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka. |
| **Qodobka 4aad:**<br>**Sareynta Dastuurka** | **Qodobka 4aad:**<br>**Sarreynta Dastuurka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Shareecada ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga dalka ugu sareeya, isaga ayayna xukuumaddu u hogaansameysaa wuxuuna hagayaaa hal abuurka iyo go'aanda siyaasadeed ee qaybaha Dawladda oo dhan. | 1) Shareecada Islaamka ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyaddu waa xeerka ugu sarreeya ee dalka, isaga ayayna u hoggaansameysaa xukuumadda heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuuna hagayaa curinta iyo go'aannada siyaasadeed ee qaybaha dawladda oo dhan. | Faqradda 1aad waxaa loo qoray hab qaanuuneed, ayadoo lagu daray "heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka" |
| | 2) Cid kastaba, dhammaan hay'adaha dawladda, ururrada siyaasadeed iyo ururrada bulshadeedba waxaa waajib ku ah in ay u hoggaasamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta Dastuurka. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay xeerinaysaa in dhammaan dadka, hay'adaha dawladda iyo kuwa gaar ka ahba khasab ku tahay in u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo talinta Dastuurka. |
| (2) Sharci kasta ama tallaabo maamul oo ka soo horjeedda Dastuurka, maxkamadda Dastuuriga ah ayaa awood u leh burrinta sharcigaas ama tallaabadaas maamul, si waafaqsan Dastuurkan. | 3) Xeer kasta, go'aan kasta, ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heer kasta ee hay'adaha dawladda, kana soo horjeeda Dastuurka, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh Maxkamadda Dastuurka. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey toosin, ayadoo si cad loo qeexay in uu yahay waxba kama jiraan xeer kasta, go'aan kasta ama tallaabo maamuleed kasta, oo ka soo baxa heer kasta dawladeed, oo ka soo horjeeda Dastuurka. |

| Qodobka 5aad:<br>Afafka Rasmiga ah | Qodobka 5aad:<br>Afka Rasmiga ah | "Afafka" Waxaa laga dhigay "afka" |
|---|---|---|
| (1) Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-soomaaliga (Maay iyo Maxaatiri), af Carabigana waa luqadda labaad. | 1) Af Soomaaligu (Maay iyo Maxaa tiri) waa Afka Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Af Carabiguna waa luuqadda labaad. | Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin, toosin baa lagu sameeyay. |
| | 2) Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa, ilaalisaa islamarkaana horumarisaa Af Soomaaliga iyo suugaantiisa. | **Faqrad cusub**<br>Waxaa loo soo kordhiyay faqraddan in Dawladda Federaalku ay la timaaddo siyaasad ay ku hormarinayso, kuna daryeelayso laguna ilaalinayo Afka-Soomaaliga iyo dhaqanka suuban ee ummadda si loo ilaaliyo jiritaanka Af Soomaaliga iyo dhaqankaba. |
| **Qodobka 6aad:<br>Calanka iyo Astaanta Qaranka** | **Qodobka 6aad:<br>Calanka iyo Astaanta Qaranka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta A ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shangees ah, madaxyo simanna leh. | 1) Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (A) ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah (bey-cad) oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shan gees ah, madaxyo simanna leh. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu kordhiyey ereyga (bey-cad) sideeda ayaa loo qaatay. |
| (2) Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta B ee Jadwalka koowaad, waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shangees ah oo dheeh qalin ah leh. Gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesba ku yaalliin ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya laba shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo | 2) Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (B) ee jadwalka koowaad, waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah, oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shan gees ah oo dheeh qalin ah leh, gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesba ku yaalliin ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya laba | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |

| | | |
|---|---|---|
| waran oo isku weydaarsan caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan laba caleen-cawbaar, diillin cadna ay ku qoofalan tahay. | shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo waran oo labo caleen cawbaar, mayrax cadna ay ku qoofalan tahay. | |
| (3) Soomaaliya Hees astaan u ah qaranka wey leedahay waana "Qolobaa Calankeed" | 3) Heesta Qaranka Soomaaliya waa "Qolobaa Calankeedu waa cayn", ayada ayayna Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadaba u isticmaalayaan munaasabadaha rasmiga ah. | Nuxurka Faqradda 3aad ee heesta astaanta Qaranka "Qolobaa Calankeed" waxba lagama beddelin aan ka ahayn in lagu kordhiyay inay tahay astaanta Dawladda Federaalka, isla markaasna ay u adeegsanayaan dawlad goboleedyada munsaabadaha rasmiga ah si loo adkeeyo midnimada qaranka. |
| | 4) Billad sharafta calanka iyo heesta qaranka ee Jamhuuriyadda iyo maammuuska ay mudan yihiin dadka mutaysta waxaa xeer gaar ah ku soo saaraya Baarlamaaanka Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa billad sharafta iyo maammuuska ay mudan yihiin calanka dadka mutaysta iyo heesta Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dadka mutaysta maammuuska ay mudan yihiin, BFS ayaana xeer kasoo soo saaraya. |
| (4) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya waxey yeelan doonaan calankooda iyo astaantooda u gaarka ah si waafaqsan nidaamka Federaalka. | 5) Dawlad goboleedyadu waxay yeelan karaan calan iyo astaan u gaar ah, balse ma yeelan karaan hees astaameed iyaga u gaar ah. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu soo kordhiyey in dawlad goboleedyadu aysan yeelan karin hees astaameed iyaga u gaar ah. |
| **Qodobka 7aad:**<br>**Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 7aad:**<br>**Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Ereyga "Dhulka" waxaa lagu beddelay "Geyiga". |
| (1) Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay koobeysaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda Sare iyo geyi-qaaradeedka iyo dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya, si | 1) Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay koobeysaa geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi qaaradeedka iyo dhul iyo biyo goboleed kasta oo ku soo biira | Ereyga "dhulka" waxaa lagu beddelay "Geyiga" maaddaama ereyga "geyiga" uu ka micno ballaaran yahay erayga "dhulka", uuna koobayo dhulka, badda iyo cirkaba. Waxaa ereyga "Sharci" lagu beddeley "Xeer". Waxaa sidoo kale oo la soo kordhiyey ereyga "webiyada". Waxaa la |

| | | |
|---|---|---|
| waafaqsan sharci uu Baarlamaanka Qaranku ansixiyo. | Jamhuuriyadda Soomaaliya, oo uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo. | sameeyey toosin oo loo siiqeeyey sidatan "oo uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo", ayadoo la tiray "si waafaqsan sharci uu Baarlamaanka Qaranku". |
| (2) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xad-gudbaan lamana qaybin karo. | 2) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lama kala goyn karo, lagumana xadgudbi karo. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay, ayadoo toosin lagu sameeyey. |
| (3) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee khilaafaadka soohdimaha caalamiga ka dhasha in xalilintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta Dalka u degsan iyo kuwa Caalamiga ah. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Sabata loo tiray ayaa ah in ay shaki gelineyso soohdimaha geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayna u horsedeyso inay khilaafaad ka abuurmi karaan xuduudeheeda. |
| (4) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii ku astaansanaa Dastuurka 1960 ee Soomaaliya. | 3) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii ku astaansanaa Dastuurka 1960 ee Soomaaliya. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (5) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:<br>a. Waqooyi: Gacanka Cadmeed;<br>b. Waqooyi Galbeed: Jabuuti;<br>c. Galbeed: Itoobiyia;<br>d. Koonfur Galbeed: Kenya;<br>e. Bari: Badweynta Hindiya. | 4) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:<br>a. Waqooyi: Gacanka Cadmeed;<br>b. Waqooyi Galbeed: Jabuuti;<br>c. Galbeed: Itoobiyia;<br>d. Koonfur Galbeed: Kenya;<br>e. Bari: Badweynta Hindiya. | **Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.**<br>**FG:** GMDHD wuxuu sameeyey daraasad dheer oo ku aaddan xuduudaha. Fadlan fiiri cilmibaarista ku xusan bogga 16aad ee warbixinta la socota soojeedinta oo tilmaamaysa habka loogu xusay xuduudaha dastuurradii iyo axdiyadii ay yeelatay Dawladda Soomaaliya iyo dastuurrada dalalka aan dariska nahay. |
| **Qodobka 8aad:<br>Shacabka iyo Jinsiyadda** | **Qodobka 8aad:<br>Shacabka iyo Jinsiyadda** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid, lamanakala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaadininta. | 1) Shacbiga Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid, lamana kala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaaddiniinta. | Faqraddan waxba lagama beddelin, balse waxaa kaloo lagu kordhiyey "Federaalka".<br>GMDHD wuxuuu diyaariyey cilmibaaris lagu daraaseenayo habka dalalka caalamku ugu |

| | | |
|---|---|---|
| | | nidaaminayaa jinsiyada muwaaddinka, ayaddoo tixgalin gaar ah la siiyey dalalka aan dariska nahay iyo kuwo isku duruufta nahay. Fadln eeg bogga 17aad ee warbixinta. |
| (2) Jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qurah, sharci gaar ah oo ay soo saaraan Golaha Shacabka ee Dawlada Federaalka Soomaaliyeed ayaana xaddidaya sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo. | 2) Jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid qur ah, xeer gaar ah oo uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo kaliya ayaa xaddidaya sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo. | Faqraddan lagu sameeyey siiqeyn, ayadoo lagu daray ereyga "Jamhuuriyadda Federaalka" waxaana ereyga "Sharci" lagu beddely "xeer". Sidoo kale ereyga " Golaha Shacabka ee Dawlada » waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka". |
| (3) Qof leh jinsiyadda Soomaaliyeed lagama qaadi karo jinsiyadda Soomaaliyeed, xataa hadduu qaato jinsiyad dal kale. | 3) Muwaaddinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu qaadan karaa jinsiyad dal kale, mana luminayo jinsiyadda Jamhuuriyadda, lagumana qasbi karo in uu ka tago jinsiyddiisa. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqayn, ayadoo lagu daray "laguma qasbi karo". |
| (4) Diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Faqradda (4) ee qodobka 8aad asalka dastuurka waa la tirtiray, waxaana nuxurkeedii lagu daray faqradda (2) ee asalka dastuurka, ayadoo lagu soo saarayo xeerka habka lagu laalayo, hakinayo, ama lagu diidayo jinsiyadda. |
| **Qodobka 9aad:**<br>**Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 9aad:**<br>**Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Muqdisho. Maqaamka magaalo-madaxda waxaa go'aan looga gaari doonaa dib u eegista dastuurka, waxaana sharci | 1) Magaalomadaxda Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya waa Muqdisho. | Faqraddan waxay qeexaysaa in caasimadda JFS ay tahay magaalada Muqdisho. |

| | | |
|---|---|---|
| gaar ah ka soo saari doona labada aqal baarlammaanka. | | |
| | 2) Maqaamka Magaalomadaxdu leedahay iyo matalaaddeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad ee Dastuurka. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan 2aad oo la soo kordhiyey waxaa lagu nidaamiyey laba arrimood oo muhiim ah oo kala ah: (a) Maqaamka Magaalomadaxda Soomaaliya; iyo (b) Matalaadda Caasimadda. Maqaamka Magaalamadaxdu leedahay iyo matalaadda ay yeelaneyso waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad ee Dastuurka oo nidaaminaya baahsanaanta awoodaha xukuumadda, qaab dhismeedka dawladda oo ah saddex heer, qaabka ay ku dhismayaan dawlad goboleedyada.<br><br>GMDHD wuxuu ka diyaariyey Maqaamka Caasimadda saddex xulusho. Fadlan eeg Warbixinta La socota Soojeedinta bogga 20aad. Guddigu wuxuu halkaas kusoo bandhigay qaar ka mid ah caasimadaha dalalka haysta nidaamka federaalka caalamka. |

# CUTUBKA LABAAD:
# XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA

Cutubkan wuxuu nidaaminayaa xuquuqda asaasiga ah, xorriyaadka iyo waajibaadka muwaaddinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sida ku xusan jaantuska warbixinta, waxaa lagu sameeyey toosin 61 faqradood iyo guud ahaan dhammaan qodobbada cutubkan marka laga reebo hal qodob, waxaana lagu soo kordhiyey labaatan iyo todoba (27) faqradood iyo hal (1) qodob oo aan ku jirin asalka Dastuurka, waxaa la tiray labo (2) qodob iyo labaatan iyo saddex (23) faqradood oo ku jiray asalkii Dastuurka KMG ah. Arrimaha lagu soo kordhiyey waxaa ka ka mid ah:

1) Xaqa ilaalinta xogta shakhsiga ah;
2) Xaqa rafcaan qaadashada;
3) Xaqa dhalinyarada;
4) In aan loo gacan gelin karin muwaaddinka JFS dal shisheeye;
5) Iskaalmaysiga sharciga ah ee caalamiga ah; iyo
6) In uusan jirin waqti u xaddidan furidda iyo oogiddda gal dacwadeed laga garnaqaayo gabood-fallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.

GMDHD wuxuu diyaariyey cilmibaaris dheer oo tilmaamaysa aragtida madahaabibta fiqiga Islaamiga ah iyo dastuurada dalalka muslimka ah si loo helo fahan dheeraad ah oo ku saabsan arrinta da'da. Sido kale, Guddigu wuxuu cutubkan u soo raray qodobka xeerinaya Guddiga Madaxabannaan ee Xuquul Insaanka.

| CUTUBKA LABAAD:<br>XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS** | **FAALO:**<br>Faahfaahin iyo sharraxaad la xiriirta soojeedinta Wax-kabeddelka |
| **Cutubka Labaad:<br>Xuquuqda Asaasiga Ah Iyo Waajibaadka Muwaaddinka** | **Cutubka Labaad:<br>Xuquuqda Asaasiga Ah Iyo Waajibaadka Muwaaddinka** | Magaca cutubka waxba lagama beddelin |
| **Madaxa Koowaad:<br>Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha** | **Madaxa Koowaad:<br>Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 10aad:<br>Karaamada Aadanaha** | **Qodobka 10aad:<br>Karaamada Aadanaha** | Waxba lagama beddelin |
| (1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu wa tacaalaa ku mannaystay qof kasta oo Banii'aadan ah, xuquuqda aadanahuna deeqdaas ayey ka dhalataa. | 1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanuhuna deeqdaas ayay ka dhalataa. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | 2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin meel-uga-dhicid karaamada Aadanaha. | 3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha. | Waxaa la tiray ereyada: "meel-ugadhicid" iyadoo lagu beddelay "xadgudub" oo ah mid ku habboon. |
| | 4) Qofna lama addoonsan karo, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo, shaqana laguma qasbi karo ujeeddo kasta ha laga lahaadee. | **Faqrad cusub**<br>Waxaa laga soo raray Qodobka 14aad ee Dastuurka, iyadoo loo arkay inay la xiriirto karaamada aadanaha. |
| **Qodobka 11aad:<br>Sinnaanta** | **Qodobka 11aad:<br>Sinnaanta** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Muwaaddiniinta oo dhan, iyagoo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, | 1) Muwaaddiniinta oo dhan, iyaga oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, | Farqadda 1aad waxaa lagu soo kordhiyay "midab, isir iyo da'" si aysan u noqon halbeegyo lagu faquuqo, loona adkeeyo |

| | | |
|---|---|---|
| dhalasho iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa. | xirfad, dhalasho, isir, da' iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba way u siman yihiin xeerka hortiisa, si waafaqsan Shareecada Islaamka. | sinnaanshaha muwaaddiniinta, sidoo kale waxaa lagu soo kordhiyey "si waafaqsan Shareecada Islaamka" kadib latashiga culummada. |
| **(**2) Wax fal takoorid ah haddii natiijadiisu noqoto is-hortaag ama ciriirigelin xaqa qofka, xataa haddii falka si ulakac ah aan loo samayn. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Sababta loo tiray ayaa ah inay soo noq-noqoneyso laguna sheegay faqradda 3aad ee isla qodobkan. |
| (3) Xukuumadda ma takoori karto Qofnaba iyadoo sababeysaneysa da'da, sinjiga, midabka, qabiil, isir, dhaqan ama lahjad, jinsi, dhalasho, Curyaannimo, diin, siyaasad ama fikir, xirfad, mulkiyad | 2) Waxaa reebban in qofna lagu sameeyo, si toos ah ama dadban**,** takoor ku salaysan da', midab, qabiil, isir, dhaqan, afguri, lab iyo dheddig, dhalasho, naafannimo, diin, afkaar siyaasadeed, xirfad, hanti ama sababo kale. | Faqradda 2aad waxaa la tiray ereyga "Xukuumadda" si falalka takooridda ku salaysan aysan keligeed ku koobneyn, balse ay u hogaansamaan cid kasta, sidoo kale waxaa lagu kordhiyey "si toos ah ama dadban" |
| **(**4) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada Xukuumadda sida Shuruuc, hab siyaasadeed iyo hab maamul ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-u-dhacsan. | 3) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada dawladda sida xeerarka, hab siyaasadeed iyo hab maamuleed ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-udhacsan. | Nuxurka Faqraddan waxba lagama beddelin, balse waxaa ereyga "xukuumadda" lagu beddelay ereyga "dawladda", si loo ballaariyo macnaha, oo ay soo gasho dhammaan qaybaha kala duwan ee dawladda. |
| | 4) Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab faldembiyeedka uu galay. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waxaa loo soo kordhiyey in si cad loogu qeexo Dastuurka in ayadoo laga duulayo mabda'a sinnaanta, qofna uusan ka baxsan karin ciqaabta dembi uu galay, isaga oo la eegayo maqaamka iyo maamuuska uu leeyahay. |
| **Qodobka 12aad:**<br>**Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah** | **Qodobka 12aad:**<br>**Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Xuquuqda asaasiga ah iyo xorriyadda lagu aqoonsaday qaybtan waa in la dhowraa marka kasta oo sharci la dejinayo lana fulinayo. Sidoo | 1) Hay'adaha Dawladda heer Federaal iyo heer Dawlad gobleedba, xisbiyada siyaasadeed, urur kasta oo gaar loo leeyahay iyo qof kastaba waa in | Faqradda 1aad waxaa loo qoray hab qaanuuneed, iyadoo nuxurka waxba laga beddelin. |

| | | |
|---|---|---|
| kale, qof kasta, hay'adaha Dawladda ee heer kasta iyo hay'adaha gaarka ah iyo saraakiisha Dawladdu marka ay gudanayaan xilkooda waa in ay ilaaliyaan xuquuqda aasaasiga ah. | ay u wada hoggaansamaan markasta xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka lagu aqoonsaday cutubkan. | |
| **(2)** Waajibaadka Dawladdu kuma koobna in ay dhawrto xuquuqda dadka, balse waa in ay qaaddo tallaabooyin maangal ah oo lagu ilaalinayo in xadgudub uga yimaado cid kale. | 2) Dawladdu waa in ay mar walba ilaalisaa, damaanad qaaddaana hirgelinta iyo ku dhaqanka xuquuqda aasaasiga ah iyo xurriyaadkaba. | Faqradda 2aad waxaa lagu qoray hab qaanuuneed, iyadoo nuxurka waxba laga beddelin. Ereyga "dhowrto" waxaa lagu beddelay "ilaalisaa, dammaanad qaaddaana". |
| **(3)** Xuquuqda lagu aqoonsaday cutubkan sharci uun baa lagu xaddidi karaa sida ku xusan Qodobka 38. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Sababaha loo tirtiray farqadda 3aad ayaa ah in ay tahay mid ku celcelis. Qof kasta wuxuu ogaan karaa nidaamka xaddidaadda xuquuqaha marka uu si guud u akhriyo. |
| **Madaxa Labaad:<br>Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda** | **Madaxa Labaad:<br>Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda** | Waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 13aad:<br>Xaqa Nolosha** | **Qodobka 13aad:<br>Xaqa Nolosha** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolol. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolol. | Waxba lagama beddelin |
| | 2) Noloshu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa siiyey banii'aadamka oo idil, sidaas daraadeed waa xaq dabiici ah oo qofna laga qaadi karin, haddii aysan jirin asbaabo xeerku tilmaamayo in xaqaasi lagu waayi karo, ayadoo xukun maxkamadeed oo kama dambays ah lagu xakumo qofkaas. | **Faqrad cusub**<br>Sababta faqradda 2aad loogu soo kordhiyay qodobkan ayaa ah in xaqa nolosha ee lagu soo sheegay Faqradda 1aad, lana xaddeeyo si waafaqsan xeerka, marka uu la yimaado ama galo fal dambi oo uu ku waayi karo xaqaasi |
| | 3) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad, oo aan looga | **Faqrad cusub**<br>Waxaa laga soo raray Qodobka 15(5). Sababta loo soo raray ayaa ah inay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maaddaama ay |

| | | |
|---|---|---|
| | maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay guddi dhaqaatiir ah oo lagu kalsoonyahay. | nolosha ka bilaabato marka ilmaha calool galo. |
| **Qodobka 14aad:**<br>**Addoonsi, Midiidin iyo Ku-shaqaysi Qasab ah** | | **Qodobkan waa la tirtiray**<br>Maaddaama nuxurkiisii lagu daray qodobka 10(4) ee isla cutubkan. |
| Sinaba qof looma addoonsan karo, midiidin lagama dhigan karo, lagama ganacsan karo, qasabna looguma shaqaysan karo. | | |
| **Qodobka 15aad:**<br>**Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada** | **Qodobka 14aad:**<br>**Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabagelyada qofnimadiisa. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabadgelyada qofnimadiisa. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay. |
| (2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amaan shaqsiyadeed waxaa ka mid ah: ka-reebanaan xarig aan sharciga waafaqsaneyn, waxaa kaloo xorriyadda qofnimo ka mid ah ka-reebanaan wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay wax kasta oo cunfi ah oo lagula kaco haweenka. Qofna looma geysan karo jirdil, fal bini'aadantinamada ka baxsan. | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa; qofna looma geysan karo qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada ka baxsan; waxaana reebban xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka. | Nuxurkii faqraddan waxba lagama beddelin, waxaa loo qoray hab qaanuuni ah. |
| (3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma qasbi karo in lagu sameeyo tijaabo takhtareed ama mid cilmibaariseed, haddii qofka ama xigtadiisa dhowi aynan oggolaanin islamarkaasina aysan jirin talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad marka uusan qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado. | 3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa, waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma samayn karo tijaabo dhakhtareed ama mid cilmibaariseed oggolaasho la'aantiisa, haddii qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado waa in la helaa oggolaashaha xigtadiisa ugu dhow, oo ku salaysan talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad. | Nuxurka faqraddan waxba lagama baddelin, waxaa lagu sameeyey toosin. |

| | | |
|---|---|---|
| (4) Gudniinka gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad u dhiganta jirdil. Gudniinka gabdhaha waa reeban yahay. | 4) Gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha waa caado naxariisdarro ah iyo xaqiraad u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay. | Faqraddan waxaa lagu qoray hab kooban oo qaanuuni ah, waxaana lagu soo kordhiyey ereyga "fircooniga ah" si loo qeexo gudniinka reebban, kadib latashiga culummada soomaaliyeed oo soojeediyey in faqraddan sideedan loo qaato. |
| (5) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii aan ka ahayn xaalad caafimaad aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada. | | **Faqraddan waa la tiray** Nuxurkeeda waxaa loo raray qodobka 13(3), sababta loo raray ayaa ah inay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maaddama ay nolosha ka bilaabato marka ay ilmuhu calool galaan |
| **Qodobka 16aad: Xorriyadda ka-mid-noqoshada** | **Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-mid-noqoshada** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro qof kale ama koox. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu abaabulo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro dad kale. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Nuxurka qodobkan waxba lagama baddelin. Ereyada "qof kale ama koox" waxaa lagu beddelay "dad kale". |
| **Qodobka 17aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada** | | **Qodobkan waa la tirtiray** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. | | Faqraddan waa la tiray kadib latashiga culummada soomaaliyeed. |
| (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | | Sababta faqraddan loo tiray ayaa loo arkay in ay tahay ku celis maaddaama lagu soo sheegay cutubka 1aad, qodobkiisa 2(2). |
| **Qodobka 18aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | **Qodobka 16aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho, soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono, | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho ra'yigiisa, kuna soo bandhigo hadal, qoraal, | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed oo la fahmi karo, iyadoo |

| | | |
|---|---|---|
| inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba. | saxaafad, farshaxan ama sidii kale oo uu doono, haddii aysan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda. | nuxurka waxba laga beddelin. Waxaana lagu soo kordhiyey nuxurka faqradda 2aad iyo ereyga "haddii aysan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo xeerarka JFS." |
| (2) Xorriyatu qoolka waxaa ka mid, xorriyadda hadalka, saxaafadda iyo wax walba oo soo gelaya warbaahinta elektaroonikada iyo internet-ka. | | **Faqraddan waa la tiray** Nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradda 1aad ee isla qodobkan. |
| (3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu muujiyo hal'abuurkiisa faneed, xorriyaddiisa aqooneed iyo xorriyadda cilmi-baarista. | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u soo bandhigo aqoontiisa ama hal-abuurkiisa faafreeb la'aan. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah, ayadoo lagu kordhiyey "faafreeb la'aan". |
| **Qodobka 19aad: Xurmada Hoyga** | **Qodobka 17aad: Xurmada Hoyga** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah lama geli karo, lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis. | Qofna hoygiisa ama meelaha kale iyo waxyaabaha u gaarka ah lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed", ereyga "gurigiisa" waxaa lagu beddeley "hoygiisa". Sidoo kale ereyada "meeshii kale ee isaga u gaar ah" waxaa lagu beddely "waxyaabaha u gaarka ah". |
| (2) Waxaa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo degganaha hoyga, baarahana waxaa ka reeban ku xadgudubka sharciga. | | **Faqraddan waa la tiray** Maaddaama nuxur ahaan ay ku jirto faqradda kore iyo qodobka 34(2). |
| **Qodobka 20aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka** | **Qodobka 18aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qaybgalo kulammo ama bannaabax oo si xasilooni ah cabasho loogu muujinayo, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qayb galo kulamo ama bannaanbax, cabasho, taageero oo lagu muujinayo si xasillooni ah, iyadoo aan oggolaansho loo baahnayn, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay marka laga reebo soo kordhinta ereyga "taageero" iyo "si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbiyo ha'adaha Dawladda. | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbin karo hay'adaha dawladda. | Faqraddan toosin kooban ayaa lagu sameeyey. |

| **Qodobka 21aad:**<br>**Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka** | **Qodobka 19aad:**<br>**Xorriyadda Isusocodka iyo Degitaanka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
|---|---|---|
| (1) Qof kasta oo si sharci ah ku deggan dhulka Jamhuuriyaddu wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u degi karo, ugu dhex-socon karo meel kasta oo dalka ka mid ah, kana bixi karo. | 1) Qof kasta oo dalka sifo sharci ku jooga wuxuu xaq u leeyahay in uu dego meesha uu rabo, kuna dhex socon karo dalka gudihiisa, si xor ahna uga bixi karo dalka goortii uu doono. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin marka laga reebo siiqada. |
| (2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda iyo joogitaanka waddanka iyo inuu helo Baasabboor. | 2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda, ka bixidda iyo joogitaanka waddanka. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin marka laga reebo in lagu daray “ka bixidda”, waxaana la tirtiray “iyo inuu helo baasaboor” ayadoo lagu daray faqradda 3aad ee hoose. |
| | 3) Muwaaddin kasta wuxuu kale uu xaq u leeyahay inuu helo baasaboor Soomaali ah, dukumentiga aqoonsiga qaranka, dukumeenti diiwaangelineed iyo aqoonsi kasta oo ay dawladdu u soo saarto muwaaddiniinta. | **Faqrad cusub**<br>Nuxurka faqraddan waxaa laga soo qaatay faqradda 2aad ee qodobkan, waxaana lagu daray faahfaahin ku saabsan qofku in uu helo dhammaan dukumentiyada muhiimka u ah socdaalka iyo degitaanka. |
| **Qodobka 22aad:**<br>**Xaqa Ka-qaybgalka Siyaasadda** | **Qodobka 20aad:**<br>**Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Muwaaddin kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb-qaato arrimaha guud ee dadweynaha. Xaqa kan waxaa ka mid ah:<br>(a) Inuu samaysan karo ama ka mid noqon karo xisbi siyaasadeed, kana qayb-qaadan karo hawlihiisa;<br>(b) In xisbi siyaasadeed gudihiisa looga dooran karo jago kasta. | 1) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka, uuna sameysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay dib-uhabayn, iyadoo laga dhigay hal faqro lagana saaray xarfaha (a) iyo (b)., waxaana lagu soo kordhiyey “si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya” |
| (2) Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto. | 2) Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay, ereyga “sharciga” waxaa lagu beddelay “xeerku” |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Xuquuqda ku xusan faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan Dastuurkan iyo sharci Baarlamaanka Federaalka. | 3) Xuquuqda ku xusan Farqadaha (1) iyo (2) ee Qodobkan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeer uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey toosin. |
| **Qodobka 23aad:<br>Xorriyadda xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda** | **Qodobka 21aad:<br>Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo. | Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| **Qodobka 24aad:<br>Xiriirka Shaqada** | **Qodobka 22aad:<br>Xuquuqda Shaqaalaha** | Cinwaanka qodobka waxaa laga dhigay "Xuquuqda Shaqaalaha" |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xiriir shaqo caadil ah. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (2) Qof kasta oo shaqaale ahi wuxuu xaq u leeyahay inuu abuuro, kuna biiro urur shaqaale, kana qayb-galo hawlaha ururkaas. | 2) Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay inuu sameeyo, kuna biiro urrur shaqaale, kana qayb-galo hawlaha urrurkaas. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (3) Shaqaale kastaa wuxuu xaq u leeyahay shaqo-joojin. | 3) Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, haddii aysan khatar ku ahayn nabadgelyada. | Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay in xaqa shaqo joojinta uusan waxyeeleynin habsami u socodka hawlaha aasaasiga ah iyo dhawrista nabadgelyada guud. |
| (4) Urur shaqaale, ama loo-shaqeeyayaasha amase loo-shaqeeyaha waxay xaq u leeyihiin inay galaan gorgortan-wadareed ku saabsan arrimaha shaqada | 4) Urur shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta waxay xaq u leeyihiin in ay wada geli karaan gorgortan wadareed oo ku saabsan arrimaha shaqada. | Faqraddan siiqo toosin ayaa lagu sameeyey |
| (5) Qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan dumarka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Sharci kasta shaqaale iyo hab dhaqan kasta waa inuu waafaqsanaadaa sinaanshaha jinsiga ee goobaha shaqada. | 5) Qof kasa oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Xeer kasta oo shaqaaleed iyo hab dhaqan kasta waa in uu xeeriyaa sinnaanta xuquuqda shaqaalaha ee lab iyo dheddigba. | Farqaddan waxaa lagu sameeyey siiqeyn, ayadoo la adeegsaday "sinnaanta xuquuqda shaqaalaha ee lab iyo dheddigba" halka asalkii Dastuurka ay ku qorneed "sinaanshaha jinsiga ee goobaha shaqada". |

| | | |
|---|---|---|
| | 6) Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda, waana in loo fududeeyaa qaab kasta oo u suurtaggelinaya shaqadooda. | **Faqrad cusub**<br>Farqaddan sabbata loo keenay ayaa ah in la ilaaliyo xuquuqda shaqo ee dadka naafada ah iyo in ay helaan dhammaan waxyaabaha u fududayn kara gudashada shaqadooda. |
| **Qodobka 25aad:**<br>**Deegaanka** | **Qodobka 23aad:**<br>**Deegaanka iyo Bii'ad Nadiif ah** | Cinwaanka qodobka waxaa lagu soo daray "iyo Bii'ad Nadiif ah" |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah. | Faqradan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad-dhaaf ah oo Deegaanka waxyeello u geysan kara. | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad dhaaf ah, oo degaanka iyo kheyraadka dabiiciga ahba waxyeello u geysan kara. | Faqraddan siiqo toosin ayaa lagu sameeyey. |
| **Qodobka 26aad:**<br>**Hantida** | **Qodobka 24aad:**<br>**Hantida Gaarka Loo Leeyahay** | Cinwaanka waxaa lagu daray ereyaya "Gaarka loo leeyahay" |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho, ku dhaqmo, ku naalloodo, iskana gado ama iska wareejiyo markuu doono. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti gaar ah yeesho, ku dhaqmo, ka faa'ideysto, kuna naalloodo, iskana gado ama hibeeyo markuu doono. | Faqraddan waxaa loo habeeyay loona qoray hab qoris sharci, iyadoo aysan waxba ka beddelin nuxurka. Waxaa la beddeley ereyga "ku naalaado" waxaa lagu bedeley "ka faa'idaysto", sidoo kale ereyga "iska wareejiyo" lagu beddeley "hibeeyo". |
| (2) Dawladdu waxay si qasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu Dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah oo lagu heshiiyey ama ay maxkamadi go'amisay | 2) Dawladdu waxay si khasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah, oo dhinacyadu ku heshiiyeen ama ay maxkamadi go'amisay. | Faqraddan siiqo toosin ayaa lagu sameeyey. |

| Qodobka 27aad:<br>Dhaqaalaha iyo Xuquuqda Bulshada | Qodobka 25aad:<br>Xuquuqda Bulshada | Cinwaanka Qodobka waxaa laga tiray ereyga "iyo dhaqaalaha". |
|---|---|---|
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay biyo nadiif ah uu cabo. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah uu cabo. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo dareyeel caafimaad, cidna lagama hor istaagi karo daryeel caafimaad oo deg deg ah sabab kasta, oo ay kamid tahay awood la'aan dhaqaale. | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad, iyadoo qofna laga reebi karin helitaanka adeegyada caafimaadka deg-deg ah sabab kasta ha jirtee. | Faqraddan waxaa loo qorey hab qaanuuni ah. |
| (3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran. | 3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.<br>GMDHD wuxuu diyaariyey fiiro faa'ido leh, oo ku saabsan sooyaalka daryeelka bulshada. Fadlan eeg warbixinta guud boggeeda 32aad |
| (4) Xuquuqada lagu aqoonsaday qodobkan waxaa ka mid ah xaqa qof kastaa uu u leeyahay inuu si sharciga waafaqsan u ilaashado, raadsado, si buuxdana xuquuqdaas u gaaro, iyadoo aanay Dawladdu ama cid kale ku soo faraggelin | 4) Hay'adaha dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in si dhab ah ugu sugaan dadweynaha dhamaantood taabbaggelinta xuquuqdaas, iyagoo si gaar ah mudnaan u siinaya haweenka, carruurta, waayeelka iyo dadka naafadda ah. | Farqaddan waxaa loo beddeley si loo caddeeyo mas'uuliyadda ka saaran dawladda taabbaggelinta xuquuqdan, iyadoo si gaar ah u tixgelineysa haweenka, dadka naafada ah. Sidoo kale faqradan waxaa lagu soo kordhiyey Faqradda 5aad ee isla qodobkan. |
| (5) Waa in la hubiyaa in dumarka, dadka da'da, naafada iyo dadka laga tiro badan yahay oo taariikhiyan latakoori jiray inay helaan kaalmo gaar ah si ay ugaaraan xuquuqdooda dhaqan – dhaqaale. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 4aad ee isla qodobkan. |
| **Qodobka 28aad:<br>Daryeelka Qoyska** | **Qodobka 26aad:<br>Daryeelka Qoyska** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo saaran Dawladda. | 1) Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo saaran dawladda. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| | 2) Qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado uuna yeesho qoys ku yimid | **Faqrad cusub** |

| | | |
|---|---|---|
| | rabitaankiisa iyo rabitaankeeda, si waafaqsan shareecada Islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda. | Nuxurka faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 5aad ee qodobkan, waxayn xeerinaysaa in rabitaanka labada qof oo qaangaaray ee isguursanaya muhiim yahay, ayadoo loo raacayo shareecada Islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda. |
| (2) Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka waa waajib saaran Dawladda. | 3) Daryeelka hooyada, dhallaanka iyo carruurta waa waajib qaran oo saaran dawladda. | Faqraddan waxaa lagu kordhiyey ereyada "carruurta" iyo "qaran". |
| (3) Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo deegaanka qoyskiisa waa in loo yeelo cid kale oo daryeesha. Isla xuquuqdan oo kale ayay leeyihiin carruurta dariiq-joogga ah iyo kuwa aan waalidkood la aqoonnin, Dawladda ayaana si gaar ah ugu xilsaaran inayxuquuqdooda ilaaliso, si buuxdana ay u helaan. | 4) Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin toosan. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa, ama uu yahay ubad dayacan, Dawladda ayaa kafaala qaadaysa xuquuqdaas. | Farqaddan waxaa lagu kordhiyey ereyga "toosan". Waxaa la beddelay ereyada "cid kale", oo lagu beddelay "Xigtadiisa". Haddii xigtadiisu ay xannaaneyn weydo dawladda ayaa kafaala qaadeyso xannaanadiisa.<br>Sidoo kale, waxaa la beddeley ereyada "caruurta dariiq-jooga ah" laguna beddeley "carruurta dayacan". |
| (4) Waalidka aan iskii isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyihiin daryeel sharci ah. | 5) Waalidka aan iskiis isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyahay in uu ka helo daryeel, waalidiinta aan daryeel ka helin ubadkooda qaangaarka ama xigtadooda, waxaa daryeelkoodu kafaala qaadaya dawladda. | Farqaddan waxaa lagu soo kor dhiyay Waalidka aan daryeel ka helin xigtadiisa waxaa mas'uul ka ah dawladda . |
| (5) Guur ansaxayaa ma jiro haddaanay si xor ah iyo oggolaansho ninka iyo naagta ka timid jirin. Labaduba waa inay gaareen da'da guurka. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa loo raray faqradda 2aad ee qodobkan. |
| | 6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya arrimaha qoyska. | **Faqrad cusub**<br>Farqaddan waxaa loo soo kordhiyay in la tilmaamo in la helo xeer nidaaminaya arrimaha qoyska. |

| Qodobka 29aad: Caruurta | Qodobka 27aad: Xuquuqda Carruurta | Waxa lagu daray ereyga "Xuquuqda" |
|---|---|---|
| (1) Ubad kastaa markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay inuu helo magac suubban iyo jinsiyad. | 1) Ubadku markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac suubban iyo in si rasmi ah loo diiwaangeliyo. | Faqraddan waxaa lagu daray erayada "diiwaangelin rasmi ah", si mustaqbalka loo diiwaangeliyo dhammaan dadweynaha deggan Soomaaliya, waxaa laga tiray ereyga "jinsiyad", maaddaama carruurta ku dhalata Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay isugu jiri karaan kuwa ay muwaaddiniin Jamhuuriyadda Soomaaliya ay dhaleen iyo kuwa shisheeye ay dhaleen, sidaa awgeed ayaa looga tiray jinsiyad si ubad shisheeyuhu dhaleen ee ku dhasha Soomaaliya looga reebo xaqa helidda jinsiyadda, iyadoo loo sababaynayo ku dhalashada geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |
| | 2) Ereyga "carruur" ee qodobkan ku xusan waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar da'da qaangaarnimada ee 15 sano, halka da'da xilkasnimaduna ay tahay 18 sano, iyadoo lagu faahfaahinayo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan waxaa laga soo raray qodobkan faqradiisa 8aad ee asalka Dastuurka. Waxaa sidoo kale lagu nidaamiyey "Da'da baaluqnimada ee 15 sano iyo "da'da xilkasnimada ee 18 sano, Sababta loo soo kordhiyey ayaa ah in siiqadaan ay kulminayso labada arrimood ee kala ah da'da qaangaarnimada (baaluqidda) oo ah 15 sano iyo da'da xilkasnimada (sinnu Rushd) ee 18 ka ah.<br><br>GMDHD wuxuu diyaariyey cilmibaari aad u dheer, si loo helo fahan dheeraad ah, oo ku saabsan arrinta da'da. Arag |

| | | |
|---|---|---|
| | | warbixinta guud ee Guddiga, bogga 33aad. Waxaana latashi lagala sameeyey culummada soomaaliyeed. |
| (2) Ubad kastaa wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqanxumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan. | 3) Ubad kasta wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqan-xumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan. | Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (3) Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda. | 4) Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda. | Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (4) Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana hayn karo dadka waaweyn dhexdooda marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo war-geliyaa xiritaankooda. | 5) Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana xiri karo dadka waaweyn dhexdooda, marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo wargeliyaa xiritaankooda. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaana loo qorey hab qaanuuneed. |
| (5) Ubadku waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmo qareennimo oo kharajkeeda ay Dawladdu bixiso, si ay uga badbaadaan dacwad kasta oo caddaalad-darro u keeni karta. | | **Faqraddan waa la tiray** Sababta loo tiray waxay tahay waa in aan lagu soo koobin oo keliya carruurta qof kasta oo eedaysane ah, oo aanan awoodin inuu bixiyo qarashka qareenka marka dacwad faldembiyeed lagu soo oogo. nuxurka faqraddan waxaa lagu daray qodobka 34aad. |
| (6) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan dagaallada hubaysan. | 6) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan dagaallada hubaysan. | Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (7) Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda khusaysa. | 7) Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh, markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda khusaysa. | Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay. |

| | | |
|---|---|---|
| (8) Ereyga “carruur/ubad” ee qodobkan ku xusan waxaa looga jeedaa qof da’diisu ka yar tahay 18-jir. | | Faqraddan waxaa loo raray faqradda 2aad ee qodobkan, waxaana lagu sameeyey siiqo toosin. |
| **Qodobka 30aad: Waxabarashada** | **Qodobka 28aad: Waxbarashada** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Waxbarashadu waa xuquuq aasaasiga ah ee ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta Soomaaliyeed. | 1) Waxbarashadu waa xaq aasaasi ah oo ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay, waxaana lagu kordhiyey “Jamhuuriyadda Federaalka” |
| (2) Dhammaan muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho lacag la’aan ah ilaa iyo dugsi sare. | 2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho lacag la’aan ah oo gaarsiisan ilaa heer dugsi sare. | Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay, haseyeeshee ereyga “dhammaan muwaaddiniinta” waxaa lagu beddeley “muwaaddin kasta”. |
| | 3) Waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiyada hoose-dhexe waa khasab. | **Faqrad cusub** Sababta loogu soo kordhiyay faqraddan waxay tahay in sare loo qaado aqoonta shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waajibna looga dhigo qof kasta waxbarashada dugsiga hoose dhexe. |
| (3) Xukuumaddu waxay mudnaan siinaysaa horumarinta, baahinta iyo fidinta waxbarashada dadweynaha. | 4) Heerarka kala duwan ee hay’adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada, waxaa waajib ku ah horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud ee dadweynaha. | Maaddaama, nidaam federal ahi uu dalka ka jiro, Dawladda Federaalka iyo Dawlad Gobaleedkaba waxaa saaran waajibka horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud. |
| (4) Waa in lagu dhisaa dugsiyada gaarka ah, machadyada iyo jaamacadaha si sharciga waafaqsan isla markaana la socdaan barnaamijyada iyo manaahijta waxbarashada dalka. | 5) Heerarka kala duwan ee hay’adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada waa in ay horumariyaan tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmi barista, hal-abuurka, cayaaraha, hiddaha iyo dhaqanka. | Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyey ereyada, “heerarka dawladda, tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmibarista, hal-abuurka, isboortiga, hiddaha iyo dhaqanka”, waxaana laga soo qaatay, laguna soo daray nuxurka faqradda 5aad ee qodobkan. |
| (5) Xukuumaddu waxay dhiirigelineysaa sare-u-qaadidda cilmi-baarista, hal-abuurka iyo | | **Faqraddan waa la tiray** |

| | | |
|---|---|---|
| farshaxanka, horumarinta ciyaaraha hiddaha & dhaqanka, isboortiga iyo dhaqanka suuban ee dadka Soomaaliyeed. | | Nuxurkeeda waxaa lagu daray farqadda 5aad ee qodobkan. |
| (6) Xukuumaddu waxay dugsiyada dalka oo dhan ka hirgelinaysaa manhaj midaysan, waxayna hubinaysaa dhaqangalkiisa. | 6) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa u xilsaaran dejinta manhaj waxbarasho mideysan ee Qaranka. Hay'adaha Dawladda ee heer kasta ayaa u xilsaaran in ay ka hirgeliyaan manhajkaas dhammaan dugsiyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradan nuxurkeedii lama beddelin, waxayna qeexaysaa in XFS ay mas'uul ka tahay dejinta manhaj midaysan, waxaana saldhig u ah heshiiskii Astaynta Awoodaha ee Golaha Wadatashiga Qaran uu saxiixay Diseembar, 2022. |
| (7) Xukuumaddu waxay kobcinaysaa waxbarashada sare, machadyada farsamada, tiknoolojiyadda iyo xarumaha cilmi-baarista. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray farqadda 5aad ee qodobkan. |
| (8) Waxaa qasab ah in la baro diinta Islaamka carruurta dugsiyada Dawladda iyo kuwa gaarka ah. Arrimmahan laguma dabaqi karo dugsiyada ay leeyihiin dadka aan Muslimka ahayn | 7) Barashada tacliinta diinta Islaamka waa ku khasab ardeyda dhigata dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ah ay leeyihiin dadka muslim ka ah. | Faqraddan waxaa loo habeeyay, loona qoray hab sharci ah iyadoo nuxurkeedii la faahfaahiyey, waaana la tiray "Arrimmahan laguma dabaqi karo dugsiyada ay leeyihiin dadka aan Muslimka ahayn". |
| | 8) Dawladdu waa in ay qaaddaa tallaabooyin muhiim u ah dhalinyarada si ay u helaan waxbrasho tayo leh, xirfad iyo horumar wax-ku-ool ah, iyada oo la carbinayo laguna beerayo jeceylka dadka, dalka iyo diintaba, islamarkaasna waa in dawladdu dhalinyarada ka ilaalisaa dhaqannada xun xun ee lidka ku ah mustaqbalka dalka. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waxaa loo soo kordhiyey in la tilmaamo dowrka muhiimka ay ku leeyihiin dhalinyaradu, loona diyaariyo dhalinyarada soomaaliyeed si u helaan waxbarasho tayo leh, xirafad iyo horumar. |
| | 9) Dawladdu waxay xaqiijinaysaa bixinta iyo helitaanka hay'adaha iyo agabka lagama maarmaanka ah si loo horumariyo awoodda dhalinyarada iyo hal-abuurkooda, sidoo kale, dawladdu waxay qaadaysaa tallaabooyinka lagu horumarinayo qaybaha kala duwan ee ciyaaraha. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa ciyaaraha iyo horumarinta awoodda dhalinyarada iyo hal-abuurkooda. |

| Qodobka 31aad: Dhaqanka iyo Afka | Qodobka 29aad: Dhaqanka iyo Afka | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
|---|---|---|
| (1) Dawladdu waa in ay horumarisaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee Shacabka Soomaaliyeed, iyadoo ku dedaaleysa in ay bulshada ka suuliso caadooyinka haraaga ah iyo kuwa dhowaan-soo-baxa ah ee wax u dhimaya midnimada, ilbaxnimada iyo caafimaadka bulshada. | 1) Hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee shacabka Soomaaliyeed, iyagoo ku dadaalaya in ay bulshada dhexdeeda ka ciribtiraan caadooyinka xun ee haraaga ah iyo kuwa dhawaan soobaxa ah ee saamayn xun ku yeelan kara diinta, midnimada iyo caafimaadka bulshada. | Faqraddan ereyga "dawladda" waxaa lagu beddelay "Heerarka kala duwan ee Hay'adaha Dawladda", si aysan ugu ekaanin ama aysan ugu muuqan mid ku kooban Xukuumadda Federaalka keliya ay saaran tahay qabashada arrimaha lagu sheegay Faqraddan.<br>Sidoo kale, waxaa loo dhigay hab sharci, oo aan nuxurka waxba ka badalin, iyadoo lagu daray ereyada "xun" iyo "diinta". |
| (2) Dawladdu waa in ay ururisaa, ilaalisaa, kaydisaa waxyaabaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee dalka, iyadoo horumarinaysa aqoonta iyo farsamada xilkaas lagu gudan karo. | 2) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay uruuriyaan, ilaaliyaan, kaydiyaan dhaxalkii sooyaalka ahaa ee ummadda sida goobaha taariikhiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyaga oo islamarkaasna horumarinaya aqoonta, kartida, teknoloojiyada iyo farsamada hay'adahaas u suurtagalin karta gudashada waajibaadkan. | Faqraddan, waxaa la beddelay ereyga "Dawladda", laguna beddeley ereyada "Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh", si aysan ugu ekaanin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda keliya ay saarantahay horumarinta arrimaha lagu sheegay qodobkan. |
| (3) Dawladdu waa in ay horumarisaa dhaqammada iyo afguriga dadka laga tira badan yahay. | 3) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, dhawraariyaana dhaqan hoosaadyada iyo afguriyada dhammaan dadka Soomaaliyeed. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn, ereyga "Dawladda" waxaa lagu beddelay ereyada "Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh". |
| (4) Xuquuqda qodobkan ku xusan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan xuquuqda asaasiga ah ee Dastuurkan lagu aqoonsaday. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Sababtoo ah, waxay si cad ugu xusan tahay mabaadii'da guud ee xuquuqda ee ku xusan cutubkan. |
| | 4) Xukuumadda Federaalku waa inay abuurto hay'ad si gaar ah u hormarisa, una kobcisa: hiddaha, dhaqanka, afka iyo sooyaalka Soomaaliyeed. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay qeexaysaa in ay muhiim tahay in la dhiso hay'ad si gaar ah u horumarisa hiddaha, dhaqanka & afka. |

| **Qodobka 32aad: Xaqa Helidda Macluumaadka** | **Qodobka 30aad: Xaqa Helidda Xogta** | Ereyga "macluumaadka" waxaa lagu beddelay ereyga "xogta" |
|---|---|---|
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka ay Dawladdu hayso. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogta ay hayaan hay'adaha Dawladda heer kasta, marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka iyo xogta lagu ilaalinayo xuquuqda dad kale, ama xeerku reebayo. | Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay in heer kasta oo dawladeed uu bixiyo xogta ay hayaan "marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka, ama xeerku reebayo" |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay helitaanka macluumaadka ay cid kale hayso oo loogu baahan yahay in lagu fuliyo ama lagu ilaaliyo xuquuq kastoo kale oo daw loo leeyahay. | | **Faqraddan waa la tiray** Sababta loo tiray ayaa ah, in ay ku xadgudbayso xuquuqda qof kale leeyahay. |
| | 2) Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin ama xeererka Jamhuuriyadda. | **Faqrad cusub** Sababtu waxay tahay in laga hortago ku khasbid in qofku uu bixiyo xog uu hayo, iyadoo awood loo isticmaalayo ilaa iyo maxkamadi ka amarto. |
| (3) Baarlamaanka Federaalku waa in uu soo saaraa sharci lagu hirgelinayo xaqa macluumaad helidda. | 3) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu hirgelinayaa xaqa helidda xogta. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay balse waxaa loo qoray hab qaanuuneed ah. Ereyga "sharci" ayaa lagu beddeley "xeer". |
| | **Qodobka 31aad: Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga** | **Qodob Cusub:** GMDHD wuxuu qodobkan u arkay muhiim, maaddaama uu nidaaminayo xaqa ilaalinta xogta shakhsiga. |
| | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la ilaaliyo xogtiisa qof ahaaneed, taas oo loo isticmaali karo oo keliya ujeeddadii loo uruuriyey. | Faqraddani waxay tilmaamaysaa in qof kasta uu xaq u leeyahay xaqqa ilaalinta xogta shaqsiga ah. |
| | 2) Xogta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu bixin karaa oo keliya oggolaashaha shakhsiga xogta leh ama sabab kale oo xeer tilmaamayo. | Faqraddani waxay xeerinaysaa in oggolanshaha qofku leeyahay ama hab kale uu xeerku sheego in lagu isticmaali karo |

| | | |
|---|---|---|
| | 3) Qofka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogtiisa gaarka ah ee la uruuriyey iyo sidoo kale in la saxo xogtiisa. | Faqraddani waxay qeexaysaa xaqa u leeyahay shakhsi kasta in uu helo xogta isaga ku saabsan ee la uruuriyey iyo xaqa in la saxo. |
| | 4) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya uruurinta, isticmaalka iyo gudbinta xogta shakhsiga ah. | Faqraddani waxay tilmaamaysaa in xeer gaar ahi uu nidaaminayo xogta shakhsiga. |
| **Qodobka 33aad: Go'aano Maamul oo Caddaalad ah** | **Qodobka 32aad: Go'aanno Maamul oo Caddaalad ah** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aammada ka soo fula maamullada ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada maamuleed ee ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah oo sababaysan, go'aan-kagaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah. | Faqraddan waxaa loo habeeyay, loona qoray hab qoris sharci, iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka. |
| | 2) Qofka kasta oo ku qanci waaya go'aannada maamuleed ee ka soo baxa hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan, wuxuuna xaq u leeyahay inuu horgeyo maxakamadda awoodda u leh. | **Faqrad cusub** Faqraddani waxay tilmaamaysa qofka ku qanci waaya go'aan maamul inuu dacwad u gudbin karo maxakamadda awoodda u leh. |
| **Qodobka 34aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca** | **Qodobka 33aad: Xaqa Dacwadda Iyo Isdifaaca** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh. | 1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay |
| (2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madax-bannaan, caaddil ah, aan eex lahayn, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go'aan-gaaris ah u leh:<br>(a) Arrin kastoo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka madaniga; ama | 2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madaxbannaan, caddaalad ku dhisan, aan eex lahayn; laguna qaado maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo muddada xeerku jideeyey. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qoris sharci, iyadoo aysan waxba ka beddelin nuxurka, waxaana la soo jeediyay in la tiro xarfaha (a) iyo (b). Waxaa kaloo la beddelay ereyga "waqti macquul ah" laguna beddeley "muddada xeerku jideeyey". |

| | | |
|---|---|---|
| (b) Fal-dembiyeed kasta oo kale lagu soo oogey, ciqaabna lagu mutaysanayo | | |
| (3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwadda uu danaynayo, heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay. | 3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwad kasta oo lagu soo oogo heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse ereyga "danaynayo" waxaa lagu beddelay "oo lagu soo oogo" |
| (4) Dawladdu waxay u kafaalo-qaadaysaa dadka aan awood dhaqaale lahayn inay difaac lacag la'aan ah helaan. | 4) Dawladdu waxay siinaysaa difaac sharci oo lacag la'aan ah dadka aan awoodin bixinta qarashka dacwadda maxkamadda iyo dadka raadinaya, oo u doodaya arrin la xiriirta danta guud. | Waxaa la isku daray farqadaha 4aad iyo 5aad ee asalka Dastuurka maaddaama ay isku nuxur yihiin. |
| (5) Dawladdu waxay u damaanad qaadaysaa difaac lacag la'aan ah shaqsiyaadka, bulshooyinka marka ay si sharci ah ay ugu raadinayaan danta guud. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray farqadda 4aad ee isla qodobkan. |
| **Qodobka 35aad:**<br>**Xuquuqda Eedaysanaha** | **Qodobka 34aad:**<br>**Xuquuqda Eedaysanaha** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof barii' ahoo aan dembi gelin ilaa maxkamadi si kama-dambays ah ugu caddayso dembiga loo haysto. | 1) Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin ilaa maxkamad awood u leh ay si kama-dambays ah ugu xukunto dembiga loo haysto. | Ereyga "barii' ahoo" waxaa lagu beddelay kalmadda "qof aan dembi gelin", sidoo kale "caddayso" waxaa lagu beddelay "xukunto" |
| (2) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in isla markiiba la ogeysiiyaa dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo. | 2) Qof kasta oo la soo qabto ama lagu soo xiro tuhun faldembiyeed wuxuu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo, wuxuuna isla markaasba xaq u leeyahay in uu ka aamuso hadal lagu eedeyn karo. | Nuxurka faqraddan waxba laga beddelin, aydoo lagu daray "uu ka aamuso hadal lagu eedeyn karo" |
| (3) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa. | 3) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa iyo qareenkiisa. | Faqraddan nuxurkeeda waxba laga beddelin, balse waxaa lagu soo kordhiyey ereyada "iyo qareenkiisa". |
| (4) Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay. | 4) Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay. |

| | | |
|---|---|---|
| | 5) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco maxkamad awood u leh horteeda, lana yimaado caddeymaha eed-iska-rogidda ah uu isku difaacayo. | Faqraddan waxa laga soo raray faqradda 9aad ee isla qodobkan, siiqaddana waa la toosiyey. |
| (5) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh. | 6) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh. | Faqradan sideedii baa loo qaatay. |
| | 7) Eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado marka dacwaddiisa la qaadayo. | Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 8aad ee isla qodobkan. |
| (6) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay Xukuumaddu u qabato. | 8) Qof kasta oo la soo xiro wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay dawladdu u qabato. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay, heseyeeshaa ereyga "xukuumaddu" waxaa lagu beddelay "dawladdu". |
| | 9) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay tarjumaan haddii uusan fahmayn afka maxkamaddu adeegsanayso. | Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 10aad ee isla qodobkan. |
| (7) Qof kasta oo maxkamad lagu soo taagey tuhun fal dembi-ciqaabeed waxa uu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah. | 10) Eedeysanuhu oo maxkamad lagu soo taagey tuhun faldembi ciqaabeed wuxuu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah. | Faqraddan nuxurkeeda waxba laga beddelin, balse ereyga "qof kasta" waxaa lagu beddelay "eedeysanuhu". |
| | 11) Qofna laguma soo oogi karo mar labaad dembi si kama dambeys ah horey loogu soo xukumay ama looga sii daayay si sharciga waafaqsan. | **Faqrad cusub**<br>Sababta faqraddan loogu soo kordhiyay ayaa ah dhaqangelinta mabda' guud ee Qanuunka Ciqaabta, kaasoo ah "in aan qofna lagu ciqaabi karin laba jeer hal dembi. |
| (8) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado dacwaddiisa. | | Faqraddan waxaa loo raray faqradda 7aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| | 12) Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi, sidaa darteed, qofna looma ciqaabi karo faldembiyeed uu galay qof kale. | Faqraddan waa isla faqradda 12aad ee asalka Dastuurka, ayadoo loo habeyey hab qanuuni ah. |

| | | |
|---|---|---|
| (9) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco caddaymaha la soo hordhigay ee lidka ku ah. | | Faqraddan waxa loo raray faqradda 5aad ee isla qodobkan ee soojeedinta GMDHD. |
| | 13) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu qofku ku kacaayay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi lid ku ah bani'aadannimada. | Faqraddan waa isla faqradda 13aad ee asalka Dastuurka. |
| (10) Eedaysanaha wuxuu xaq u leeyahay in loo qabto turjumaan hadii uusan garanayn afka maxkamadda laga isticmaalayo. | | Faqraddan waxa loo raray faqradda 9aad ee isla qodobkan ee soojeedinta GMDHD. |
| | 14) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay in uu racfaan u qaato maxkamad ka sarreysa tan xukunka gaartay hadduusan ku qancin xukunka Maxkamadda. | **Faqrad cusub**<br>Sababta faqradda cusub loogu soo kordhiyay ayaa ah in Dastuurka lagu adkeeyo xaqa racfaan qaadashada ee heerarka kala duwan ee maxkamadaha. |
| (11) Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado booqashada eheladiisa, takhtarkiisa iyo qareenkiisa. | 15) Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado booqashada eheladiisa, dhakhtarkiisa iyo qareenkiisa. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay. |
| (12) Mas'uuliyada ciqaabtu waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dembiyeed uu galay qof kale. | | Faqraddan waa isla faqradda 12aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka, ayadoo loo habeeyey hab-qanuuni ah, lana tiray kalmadda "Mas'uuliyada ciqaabtu waa shakhsi," |
| (13) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi ka soo horjeeda bani'aadannimada, laguna caddeeyey qawaaniinta dawliga ah. | | Faqraddan waa isla faqradda 13aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| **Qodobka 36aad:**<br>**Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha** | **Qodobka 35aad:**<br>**Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan sharciga, iyo in uu jiro heshiis isu-celin ah oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliyeed celinta eedaysanaha ama dembiilaha. | 1) Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan xeerka, iyo in uu jiro heshiis isucelin ah, oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya celinta eedaysanaha ama dembiilaha. | Faqraddan sideedii baa loo qaatay, balse ereyga "Soomaaliyeed" waxaa lagu beddelay "Soomaaliya", sidoo kale, ereyga "sharciga" waxaa lagu beddelay "xeer" |
| (2) Isucelinta eedaysanaha iyo dembiilaha waa in ay ahaataa mid waafaqasan dhaqanka iyo qaanuunka caalamiga ah, waana in Baarlamaanka Federaalka ah soo saaraa sharciga lagu maamulayo isucelinta dembiilayaasha. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradaha 1aad iyo 4aad ee isla qodobkan. |
| | 2) Muwaaddinka Soomaaliya looma gacangelin karo dal shisheeye. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay ay xeerinaysaa in qof muwaaddin ah aan loo dhiibi karin dal shisheeye. |
| | 3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah.<br>. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay qeexaysaa in Dawladda Soomaaliya ay horumarinayso iskaashi iyo iskaalamaysiga casri. si la iskaga kaashado dembiyada. |
| | 4) Baarlamaanka Federaalka ah ayaa soo saaraya xeer ku saabsan isu-celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha iyo iskaalmaysiga sharciyeed ee arrimaha dembiyada. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay tilmaamaysaa in ay muhiim tahay in BFS uu soo saaro xeer lagu nidaaminayo isucelinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha iyo iskaalmaysiga sharciyeed. |

| **Qodobka 37aad:**<br>**Qaxootiga iyo Magangelyada** | **Qodobka 36aad:**<br>**Qaxootiga iyo Magangelyada** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
|---|---|---|
| (1) Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala qaxootinnimo wuxuu xaq u leeyahay in aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab. | Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala magangalyo-doon ama loo aqoonsado qaxooti wuxuu xaq u leeyahay in aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmaayo ciqaab ama khatar lid ku ah. | Faqraddan waxaa loo habeeyey hab qaanuuni ah ayadoo lagu daray "magangalyodoon" maaddaama ay kala duwan yihiin magangalyodoon iyo qaxootinimo. Sidoo kale, waxaa lagu daray "ama khatar lid ku ah" |
| (2) Baarlamaanka Federaalka ihi waa in uu soo saaraa sharci waafaqsan qaanuunka caalamiga ah; kaas oo nidaaminaya qaxootiga ama magangelyo-doonka. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray cutubka 5aad ee nidaaminaya Asteynta Awoodaha gaar ahaan Qodobbada 53aad iyo 54aad ee asalka Dastuurka. |
| **Qodobka 38aad:**<br>**Xaddidaadda Xuquuqda** | **Qodobka 37aad:**<br>**Xaddidaadda Xuquuqda** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Xuquuqda lagu sheegay Cutubkan waxaa xaddidi kara sharciga, haddii sharcigaasi uusan si gaar ah u bar-tilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo. | 1) Xuquuqdan waxaa xaddidi karaa xeer, ama xaddidaad si gaar ah Dastuurka dhexdiisa ugu xusan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo waafaqsanna qiyamka lagu qeexay Dastuurka, islamarkaasna xaddidaaddaasi aysan si gaar ah u bartilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo gaar ah. | Faqraddan nuxurkeeda waa la beddelay, waxaana lagu soo kabay nuxurka faqradda 2aad ee qodobkan. |
| (2) Xuquuqdan waxaa xaddidaya sharciga, ama waxaaba si gaar ah loogu asteeyay cutubkan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo oo waafaqsan qiyamka lagu qeexay Dastuurka. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>nuxurkeeda waxaa lagu daray faqraddann 1aad ee isla qodobkan. |
| (3) Marka go'aan laga gaarayo in xaddididda xuquuqdu ay noqoto mid la aqbali karo oo maangal ah, waa in dhammaan arrimaha xaddeyntan khuseeya xisaabta lagu darsadaa. | 2) Xadiddaadu waxay imaan kartaa oo keliya marka ay jirto baahi culus oo lagu xaqiijinayo: dhawritaanka xuquuqda cid kale, amniga guud, difaaca dalka, caafimaadka guud iyo anshaxa | Faqradda 3aad iyo 4aad ee qodobkan ee asalka dastuurka waa la isku biiriyay, maaddaama ay labada Faqradood ka wadahadlayaan arrimaha la siinayo |

| | | |
|---|---|---|
| | wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo isu dheellitirnaanta xaddidaada iyo asbaabta keentay. | tixgelinta marka ay go'aan laga gaarayo Xadaynta xuquuqdda iyo xoriyaadka ku xusan cutubkan. |
| (4) Arrimaha la xiriira waxaa ka mid ah dabeecadda iyo ahmiyadda xuquuqda la xaddidey iyo muhimmadda ujeeddo la rabo in lagu gaaro xaddidaadda; haddii xaddididdaasi u habboon tahay in lagu gaaro ujeeddada ama haddii isla ujeeddadaas lagu gaari karaayey iyadoo aan la xaddidin xuquuqdaas. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Waxaa la soojeediyey in lagu daro faqradda 2aad ee soojeedinta ee kore. Fadlan eeg faallada ku xusan faqradda kore. |
| | 3) Hay'adaha garsoorka ayaa dammaanad qaadaya in aan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waxaa loo soo kordhiyey in ay lagama maarmaan tahay in la qeexo in hay'adaha garsoorku ay leeyihiin mas'uuliyadda in ay dammaanad qaadaan ilaalinta xuquuuqda, xoriyaadka iyo qiyamka uu xambaarsan yahay Dastuurka. |
| (5) Xaddididda suurtogalka ah ee xuquuqda asaasiga ah ee muwaaddinka xilliga xaaladda deg degga waxaa lagu sheegay Cutubka 14aad, Qodobka 131aad. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>maaddaama ay dhici karto in la xaddido xuquuqda aasaasiga ah marka ay timaaddo xaalad degdeg ah taasoo ku xusan cutubka amniga ka hadlaya. |
| **Qodobka 39aad:<br>Sixidda Ku-xadgudubka Xuquuqda Aadanaha** | **Qodobka 38aad:<br>Dib-uxaqsooridda La Xiriirta Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha** | Waxaa la tiray ereyga "sixidda" laguna beddelay ereyada "dib-uxaqsooridda la xiriira", oo la micno ah "ka garnaqidda" |
| (1) Sharcigu waa in uu qeexaa habraac habboon oo lagu saxayo xadgudubyada xaquuqda Aadanaha. | 1) Qof kasta waxuu xaq u leeyahay magdhow haddii lagu xadgudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah, waxaana go'aan ka gaaraya dacwaddiisa maxkamad awood u leh. | Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn dhinaca siiqadda sharciga iyadoo nuxurkeeda aanan wax laga beddelin keliya la adkeeyay in xadgudubyada xuquuqda aadanaha loo gaysto ha ahaadaan kuwa dhacay, dhacaya ama |

| | | |
|---|---|---|
| | | mustaqbalka dhici kara in maxkamad la horgeeyo si loogu sameeyo xaqsoor dhibbanayaasha. |
| (2) Sixidda xadgudubyadaas waa in lagu helaa maxkamad ay dadku si fudud dacwad uga furan karaan. | | **Faqraddan waa la tiray** Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan |
| (3) Qof ama urrur way u dacwoon karaan maxkamad, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ee dadka kale leeyahiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan. | 2) Qof ama urrur wuu u dacwoon karaan maxkamad awood u leh, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ah ee dadka kale leeyihiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay |
| | 3) Ma laha waqti xaddidan furidda oogiddda gal dacwadeedka la xiriira gabood-falada xuquuqda aadanaha, dembiyada dagaalka iyo dembiyadda lidka ku ah binii'aadannimada oo ay xeeriyeen xeerarka Jamhuuriyadda ama heshiisyada caalamiga ah, oo ay Soomaaliya qayb ka tahay. | **Faqrad cusub** Faqraddan waxaa loogu soo kordhiyey si loo qeexo in uusan jirin waqti u xaddidan furidda oogiddda gal dacwadeedka gabood-falada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.<br><br>GMDHD wuxuu diyaariyey daraasad dheer oo ku saabsan habka ugu habboon ee loogu nidaamiyo arrintaan. |
| | 4) Dacwadaha ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan waxaa qaadi kara maxkamad awood u leh, madaxbannaan, oo eex ka maran garsooriddeeda. gabood-faladaas lama siin karo gabbaad nooc kasta oo uu yahay, lamana cafin karo haddii uusan Dastuurku si kale u sheegin. | **Faqrad cusub** Faqraddan waxaa loogu soo kordhiyey si loo qeexo in gabood-falada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha aan gabaad laga gali karin lana cafin karin. |
| | 5) Dawladdu waxay qaadaysa tallaabooyin caddaaladeed, garsooreed, maamuleed, tacliimeed iyo tallabo kastoo kale, oo ay uga hortageyso, ku ciqaabmarineyso ama ugu dib-garnaqayso si ay u saxdo cid kasta oo dhibaato geesatay maqaam kastoo ay leeyihiiin. | **Faqrad cusub** Faqraddani waxay faraysaa in dawladda Soomaaliya ay qaaddo tallaabooyinka muhiimka ah ee ku aaddan arrimahan. |

| | | |
|---|---|---|
| | 6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya dib-uxaqsooridda xadgudubyada xuquuqda aasaasiga ah. | **Faqrad cusub**<br>Waxaaa lagama maarmaan ah in la helo xeerar qeexaya magdhowga iyo xaqsoorka xadgudubyada. |
| **Qodobka 40aad:**<br>**Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah** | **Qodobka 39aad:**<br>**Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Marka la fasiraayo xuquuqda ku xusan qaybtan waa in maxkamaddu ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqdaas iyo qiyamka ay xambaarsan yihiin. | 1) Marka la fasirayo xuquuqda ku xusan cutubkan waa in maxkamad awood u leh ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqda asaasiga ah iyo qiyamka saldhigga u ah Dastuurkan. | Faqraddani nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu daray ereyada “awood” iyo “aasaasiga”. |
| (2) Fasiraadda xuquuqdan waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada, qaanuunka caalamiga ah iyo go’aannada maxkamadaha dalal kale, inkasta oo ayan qasab ku ahayn inay raacdo go’aannadooda. | 2) Marka ay fasirayso xuquuqahani waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada Islaamka, qaanuunka dawliga ah, dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo mabaadi’da iyo halbeegga fasiraadda xeerarka ee caalamiga ah, ilaa iyo inta fasiraaddaas aysan ka horimaaneyn Dastuurka iyo qiyamka saldhigga u ah. | Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn si loo caddeeyo in Dastuurka JFS mudnaanta ka yeelanayo dhammaan qaanuunka dawliga ah iyo qaanuunka caalamiga ah. Waxaa kale oo lagu daray “maqaasidda” iyo “dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo mabaadi’da”<br>Waxaana la tiray “iyo go’aannada maxkamadaha dalal kale, inkasta oo ayan qasab ku ahayn inay raacdo go’aannadooda” |
| (3) Marka guud ahaan sharci la fasiraayo ama la dhaqan-gelinaayo, maxkamad kasta ama xeer-beegti waa in ay tixgelisaa muhiimmada qodobbada Cutubkan, intii suurtagal ahna go’aannadooda ka dhigaan kuwo la socon kara qodobbadaasi. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobkan. |
| (4) Xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama hor-imaaan karaan xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku jideysey iyo xeer-dhaqameedka la jaanqaadi kara Shareecada iyo Dastuurka. | 3) Aqoonsiga xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama hor-imaaan karaan xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku aqoonsatay. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoo la tirtiray “xeer-dhaqameedka la jaanqaadi kara Shareecada iyo Dastuurka”, maaddaama xuquuqdaan |

| | | |
|---|---|---|
| | | Dastuurka ku xusan ay ka hormarayso xeerdhaqameedka. |
| **Qodobka 41aad:<br>Guddiga Xuquuqda Aadanaha** | **Qodobka 40aad:<br>Guddiga Xuquuqda Aadanaha** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| (1) Baarlamaanka Federaalka ihi waa inuu dhisaa Guddi Xuquuqda Aadanaha u qaybsan oo ka madax bannaan maamulka Dawladda, lehna ilo dhaqaale oo uu si habsami leh ugu fuliyo hawlihiisa. | 1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqda Aadanaha oo uu waajibkiisu yahay:<br>a) Xoojinta, sare-uqaadidda, difaacidda, xushmeynta iyo xaqiijinta qiyamka xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha guud si waafaqsan: Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda;<br>b) U kuurgelidda, baarista iyo diyaarinta warbixinno la xiriiro xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Dalka;<br>c) Ka hortagga tacaddiyada iyo ku xad-gudubyada xuquuqda aadanaha iyo ku wargelintooda hay'adaha qaranka ee ay khusayso;<br>d) Hubinta damaanadqaadka xuquuqda aasaasiga iyo dhowrista habdhaqanka xuquuqda aadanaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>e) Ka talobixinta habka ugu habboon ee lagu dhowri karo xuquuq aadanaha iyo xaqsoorka gaboodfalada, iyo kala talinta dawladda ee ka mid noqoshada iyo gelidda heshiisyada caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Dalka;<br>f) Baarista iyo diiwaangelinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha, kormeeridda xabsiyada iyo goobaha kale ee dadka lagu | Faqraddan waxaa lagu daray nuxurka laga soo raray qodobka 111B ee Cutubka 10aad.<br><br>Faqraddani waxay nidaaminaysaa awoodaha iyo waajibaadka Guddiga, waxaana halkan loo keenay in si fudud la iskugu xiro guddiga iyo cutubkan oo xeerinaya axkaamta xuquuqda aadanaha. |

| | | |
|---|---|---|
| | xiro iyo wacyi-gelinta bulshada ee xuquuqda aadanaha;<br>g) Qabashada howl-kasta oo kale ee uu sharcigu u xilsaaro. | |
| (2) Hawlaha Guddiga Xuquuqda Aadanaha waa in ay ku jiraan horumarinta aqoonta xuquuqda Aadanaha iyo, gaar ahaan, Shareecada, asaga oo u dejinaaya halbeegyada dhaqangelinta lagu hirgelinaayo waajibaadka xuquuqda Aadanaha; dabagelidda xuquuqda Aadanaha ee dalka gudihiisa iyo baarista eedaha la xiriira xuquuqda aadanaha. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Sababaha loo tiray ayaa ah in Guddiga Xuquuqda Aadanaha lagu nidaaminayo cutubkan, awoodihiisa iyo xilalkiisa, waxaana lagu faahfaahiyey cutubkan hawlaha guddiga, ayadoo soo daray cutubkan nuxurka laga soo raray qodobka 111B ee Cutubka 10aad ee Asalka Dastuurka. |
| | 2) Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo uu soojeediyo Golaha Wasiirada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay nidaaminaysaa tirada xubnaha Guddiga iyo habraaca magacaabistooda. |
| | 3) Baarlamaanka Fedeeraalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa xeer qeexaya shuruudaha xubnaha iyo dhammaan arrimaha u muhiimka ah guddiga. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay tilmaamaysaa in uu BJFS uu soo saarayo xeer lagu faahfaahinayo arrimaha muhiimka u ah Guddiga. |
| **Madaxa Saddexaad:**<br>**Waajibaadka Muwaadinka** | **Madaxa Saddexaad:**<br>**Waajibaadka Muwaaddinka** | Waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 42aad:**<br>**Waajibaadka Muwaaddinka** | **Qodobka 41aad:**<br>**Waajibaadka Muwaaddinka.** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| **(1)** Sida Diinta Islaamku qabto, caddaaladda waxay ku jirtaa isu-dheellitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka. | 1) Sida Diinta Islaamku qabto, caddaaladda waxay ku jirtaa isu-dheellitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka. | Faqraddan sideedii ayaa loo qaatay. |

| | | |
|---|---|---|
| **(2)** Ku-dhaqanka sinnaanta, xorriyaadka iyo xuquuqda lagama sooci karo waajibaadka. Sidaas darteed, muwaaddin kasta waxaa waajib ku ah in uu:<br>(a) Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;<br>(b) Ka qayb-qaato hawlaha waxtarka u leh muwaaddinka, qoyska, wanaagga guud iyo in uu kaqayb-qaato horumarinta qaranka iyo bulshada uu la nool yahay;<br>(c) Horumariyo mas'uuliyadda waalidnimo;<br>(d) Dhiiriggeliyo midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;<br>(e) Horumariyo mabda'a isla-xisaabtanka iyo talinta sharciga;<br>(f) Noqdo qof aqoon u leh qodobbada Dastuurka, si daacad ahna uu u taageero, una difaacoDastuurka iyo shuruucda dalka;<br>(g) Ku dedaalo/ku dedaasho codbixinta xilliyada doorashada;<br>(h) Noqdo canshuur-bixiye wanaagsan, si uu uga qayb-qaato kharajka Dawladda si waafaqsan awooddiisa waxbixineed iyo sharciga;<br>(i) Difaaco dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | 2) Muwaaddin kasta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah inuu u hoggaansamo arrimaha soo socda:<br>a) Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;<br>b) Difaaco ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha.<br>c) Dhiiriggeliyo midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;<br>d) Horumariyo mas'uuliyadda waalidnimo;<br>e) Barto aasaasiyaadka diinta islaamka;<br>f) Si buuxda u barto, u xurmeeyo, ku dhaqmo, una hoggaansamo, difaacaana Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka;<br>g) Horumariyo mabda'a islaxisaabtanka iyo sarraynta sharciga;<br>h) Bixiyo canshuurta si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>i) Ka qayb-qaato hawlaha waxtarka u leh muwaaddinka, qoyska, wanaagga guud iyo in uu kaqayb-qaato horumarinta qaranka iyo bulshada uu la nool yahay;<br>j) Ka ilaaliyo degaanka wasakhda iyo waxyeellada aan loo baahnayn;<br>k) Dhowro xuquuqda xayawanaadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>l) Inuu codeeyo doorashooyinka. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u habeyn taxanaha xarfaha faqradda 2aad ay u qoran tahay.<br><br>Xarfaha "a, b, c, d, e," faqradda 2aad ee asalka dastuurka waxaa loo qaatay sideedii, halka lagu sameeyey toosin xarfaha "f, g, h, iyo i" ee faqradda 2aad asalka dastuurka.<br><br>xarafka (b) ee faqradda 1aad ee soojeedinta, waxaa kale oo lagu soo kordhiyey "ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha".<br><br>Waxaa la soo kordhiyey xarfaha "e, j, k," oo faraya muwaaddin kasta barashada aasaasiyaadka diinta islaamka, ka ilaalinta deeganka wasakhda iyo dhawridda xuquuqda xayawaanka JFS.<br><br>Waxaa lagu daray faqradda 3aad ee isla qodobkan nuxurka "Ku-dhaqanka sinnaanta, xorriyaadka iyo xuquuqda lagama sooci karo waajibaadka. Sidaas darteed". |
| | 3) Marka la fasirayo waajibaadka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan laguma xaddidi karo xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan cutubkan. | **Faqrad cusub**<br>Sababaha uu GMDHD u soo kordhiyey ayaa ah in marka la fasirayo waajibaadyada faqradda 2aad ee qodobkan in aanan loo fasirin hab |

| | | |
|---|---|---|
| | | xaddidaysa xuquuqda iyo xoriyaadka asaasiga ah ee ku xusan cutubkan. Nuxurka faqraddan waxaa ka mid ah hordhacii faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka dastuurka. |

## CUTUBKA SADDEXAAD:
## DHULKA, HANTIDA IYO DEEGAANKA

Cutubkan saddexaad wuxuu nidaaminayaa Dhulka, Hantida iyo Deegaanka. Cutubkan waxaa inta badan qodobbadiisa lagu sameeyey toosin, waxaana lagu soo kordhiyey: Saddex (3) qodob iyo saddex iyo tobon (13) faqradood oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka, sidoo kale waxaa la tiray hal (1) faqrad. Axkaamta lagu soo kordhiyey cutubkan waxaa ka ka mid ah:

1) Dhismaha Guddiga Qaranka Dhulka, waajibaadkiisa, xubnihiisa iyo shuruudaha.
2) Axkaamta la xiriirta dhulka qofka aan muwaaddinka aheyn uu adeegsan karo, cidda awoodda u leh bixiintiisa, iyo xayndaabka sharci.
3) Aasaasidda wakaaladaha u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in kheyraadka dabiiciga ah looga faa'iidaysto si caddaalad ah.
4) Guddiga u xilsaaran abaabulka iyo dardargelinta uruurinta dakhliga.
5) Mas'uuliyada dawladaha heer federal iyo heer dawlad goboleed ee ka saaran deegaanka sida ilaalinta iyo dhowrista deegaanka, sidii dalku u noqon lahaa mid doogeysan, wacyigelinta bulshada, ilaalinta isir-hayeenka iyo nafleyda.

GMDHD wuxuu daraasad ku sameeyey heshiiskii Golaha wadatashiga Qaranka ee lagu gaaray Baydhabo 2018[kii], wuxuu u arkay in qayb ka mid ah lagu dari karo Dastuurka gaar ahaan cutubkan iyo cutubka federaalaynta maaliyadda, halka qaybaha kale Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku soo saarayo xeer.

| | | |
|---|---|---|
| **CUTUBKA SADDEXAAD:<br>DHULKA, HANTIDA IYO DEEGAANKA** | | |
| **ASALKA DASTUURKA KMG** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS .** | **FAALO:**<br>Faahfaahin iyo sharaxaad la xiriirta soojeedinta Wax-kabeddelka |
| **Cutubka Saddexaad:<br>Dhulka, Hantida Deeganka** | **Cutubka Saddexaad:<br>Dhulka, Hantida Iyo Deegaanka** | Magaca cutubka waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 43aad:<br>Dhulka** | **Qodobka 42aad:<br>Dhulka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| | 1) Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waa mid cusub oo lagu soo kordhiyey, si loo xaqiijiyo mabda' ah in dhulka uu leeyahay shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. GMDHD wuxuu sameeyey daraasad ku saabsan dhulka, fadlan fiiri bogga 46aad ee warbixinta. |
| (1) Dhulku waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka. | 2) Dhulku waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka. | Faqraddan sideedii ayaa loo qaatay. |
| (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh | 3) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaa loo qaybiyey laba faqradood. Qaybta 1aad oo noqonaysa faqradda 3aad ee qodobkan, waxay xeerinaysaa sifada dhulka lahaanshahiisa lagu haysan karo, lagu sheegan karo, laguna isticmaali karo oo ah mid waafaqsan xeerarka dalka. Qaybta 2aad oo noqonaysa faqradda 4aad ee qodobkan, waxay iyadana xeerinaysaa sida dhulka guud ahaan loo isticmaalayo, loona maamulayo iyada oo lagu daray erey-bixinno sii faahfaahinaya. |

| | | |
|---|---|---|
| | 4) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, loo adeegsanayaa, loona maamulayaa si caddaalad ah oo u agaasiman wax soosaarid uu dhulku xammili karo, waxna u dhimayn, kana soo horjeedin xeerarka dhaqangalka ka ah dalka iyo danta guud. | **Faqrad cusub**<br>Faqaddani waxay xeerinaysaa sida dhulka guud ahaan loo maamulayo, iyada oo lagu daray erey bixinno sii faahfaahinaya. |
| (3) Xukuumaddu Federaalku waa inay dejiso siyaasad dhuleed oo heer qaran ah oo si joogto ah dib-u-eegis loogu sameeyo. Siyaasaddaasi waa in ay xaqiijiso:<br>a) U sinnaanshaha fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;<br>b) Damaanad-qaadista xuquuqda lahaanshaha dhulka iyo diiwaangelinta;<br>c) Xaqiijinta ka faa'ideysiga dhulka si waafaqsan Mabaadi'da ka dheefsashada dhulka iyadoon dhibaato loo geysan;<br>d) In si deg deg ah oo lagu wada qanci karo loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha dhulka iyo hantida;<br>e) In la xaddido dhulka uu qof ama shirkadi yeelan karaan;<br>f) In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga dhulka, si looga hortago ku-takrifalidda xuquuqda milkiilayaasha dhulka ee yaryar;<br>g) Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay dejinayaan siyaasad-dhuleed oo heerkooda ah. | 5) Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashaneysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka qaran oo lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogto ahna dib-u-eegis loogu sameeyo, si loo xaqiijiyo:<br>a) Dhawraarinta iyo ilaalinta deegaaneed ee u nugul waxyeellada saameeya isu dheellitirnaanta xiriirka deegaaneed iyo meelaha kale ay ku jirto dan guud;<br>b) In loo siman yahay fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;<br>c) In si sugan loo damaanadqaado milkiyadda dhulka iyo diiwaangelinta;<br>d) In si sugan loo xaqiijiyo in dhulka loo dheefsaday si waafaqsan mabaadi'da xeeriya isticmaalka dhulka iyadoo aan wax dhibaato loo geysan;<br>e) In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro, haddiiba khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo milkiyadda;<br>f) In la xaddido inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karto; | Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin. Waxaa la soo kordhiyey: xarafka (a) "Dhawraarinta iyo ilaalinta deegaaneed ee u nugul waxyeellada saameeya isu dheellitirnaanta xiriirka deegaaneed iyo meelaha kale ay ku jirto dan guud".<br><br>Hase ahaatee xarafka (g) ee faqraddan waxaa laga dhigay faqrad gooni ah oo ah tan 6aad, maaddaama ay ka hadlayso awoodda dawlad goboleeyada ay u leeyihiin dejinta siyaasadda dhulka ee heerkooda ah.<br><br>Sidoo kale waxaa la soojeediyay in la isku daro qaar ka mid ah faqaddaha si loo helo qaab urursan oo isku xiran maangalna ah. Sidoo kale, waxaa kalmadda " si looga hortago ku-takrifalidda" waxaa lagu beddelay " si loo ilaaliyo".<br><br>**FG:** Ereyga dhawraarinta ee ku jira faqradda 5(a), waxaa loola jeeeda wax wax kale gaashaan dhibaato uga ah. Wax lagu dhawro ama laysaga dhawro, sida dhawridda ama dhawrista (eeg Bogga 222 ee Qaamuuska Af-soomaaliga), kaddib |

| | | |
|---|---|---|
| | g) In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga ee dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulka yar leh. | latashiga qaar kamid ah khuburada af-soomaaliga waxaa loo arkay in muhiim tahay in la adeegsado "dhawraarin" oo leh mug iyo macna weyn, ayadoo loo arkay in ay munaasabtahay in la adeegsado.<br>**Xiriirka Deegaaneed** (Bey'adeed): waa isudheellitirnaanta xiriirka ay nafleyda midba midda kale la leedahay iyo degaanka ay ku nool yihiin oo hareeriya. (Ecolojical), Tusaale: wasakhda lagu daadiyo badweynta wuxuu halis culus ku yahay inuu wax weyn u dhimo xiriirka isu dheellitirnaanta deegaaneed (bey'adeed). |
| | 6) Dawlad Goboleedyada waxay dejinayaan siyaasad dhuleed oo heerkooda ah, oo aan ka hor imaanayn siyaasadda qaran ee Dhulka iyo xeerarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub**<br>Faqraddan waa cusubtahay, balse nuxurkeeda waxaa laga soo raray xarafka "g" ee faqradda kore ee asalka Dastuurka, waxaana lagu daray "aan ka hor imaanayn siyaasadda qaran ee dhulka iyo xeerarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya". |
| (4) Lama bixin karo ruqsad la xiriirta isticmaalka abadiga ah ee berriga, badda iyo hawada sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sharci Baarlamaanka Federaalku soosaaro ayaa xaddidaya baaxadda, muddada iyo shuruudaha rukhsadaha istcimaalkooda. | 7) Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer, haseyeeshe, ma jiri karto qayb ka mid ah dhulka, badda ama hawada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax istacmaal joogto ah. | Faqradan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, haseyeeshee, waxaa lagu sameeeyey toosin. |
| | 8) Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya ku haysasho ama heshiis kiro ah, muddo aan ka badnayn midda xeerku cayiman, waana haddii heshiiskaas ay dan guud ku jirto oo | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay nidaaminaysaa dhulka qofka aan muwaaddinka ahayn uu adeegsan karo, cidda awoodda u leh bixiintiisa, iyo xayndaabka sharci. |

| | | |
|---|---|---|
| | islamarkaasna dhib ku aheyn madaxbannaanida Jamhuuriyadda, uuna ansixyo Baarlaamaanka Federaalka Soomaaliya. | Fasiraad isticmaal caariya ah, ama caariyeyesasho waa wax milkiyadiisu adigu lahayn oo laguu siiyo isticmaal iyo ku intifaac muddo xaddidan, oo ku meelgaar ah; ereg ahaan loo bixiyo, amaah ahaan u bixin, (leasehold tenure). |
| (5) Dawladda Federaalku iyadoo la tashaneysa Dawladaha xubinta ka ah Federaalka iyo ciddii kale oo ay quseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka iyo qaab lagu koontaroolo, laguna isticmaalo dhulka. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Maaddaama nuxurkeedii lagu daray soojeedinta faqradda 6aad ee qodobkan. |
| | **Qodobka 43aad:**<br>**Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka** | **Qodob cusub** (eeg faalada warbixinta guud lambarka 4.2) |
| | 1) Waxaa jiraya Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo heer Qaran ah, kaasoo uu xeer ku soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan waxaa lagu xeeriyey dhismaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo xeer BFS lagu dhisayo.<br>GMDHD sameeyey daraasad la xiriirta maamulka dhulka, fadlan eeg bogga 48 ee warbixinta. |
| | 2) Xilalka iyo waajibaadka Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka waa:<br>a) Ka talo bixinta nidaamka diwaangelinta warqadaha milkiyadaha dhulka laga diiwaangelinayo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil.<br>b) In uu Dawladda Federaalka kala taliyo bixinta dhulalka isticmaal caariya loo siinayo dad ama hay'ado aan ahayn muwaaddiniin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>c) In uu cilmibaaris ku sameeyo arrimaha ku saabsan dhulka iyo isticmaalkiisa, kana soo | Faqraddani waxay nidaaminaysaa xilalka iyo waajibaadka Guddiga Qaranka Dhulka. |

| | | |
|---|---|---|
| | saaro talooyin una jeediyo hadba hay'daha xil ahaan ugu abbaaran.<br>d) In uu Dawladda Federaalka kala taliyo dib-u-eegista xeerarka dhulka, xeer nidaamiyeyaasha iyo nidaamyada siyaasadeed, ee lagu maamulo dhulka.<br>e) In Guddigu uu iskiisa u bilaabi karo baarista cabashooyinka caddaaladdarro dhuleed ee jira ama horay u dhacay kana soojeediyo talooyinka ugu habboon oo dib-u-garsoorid loogu samayn karo.<br>f) In uu hay'adaha u xilsaaran xallinta khilaafaadka dhulka kala taliyo sida ugu habboon ee lagu xallin karo arrimaha ku saabsan milkiyadda, diiwaangelinta iyo maareynta dhulka.<br>g) Inuu u kuurgalo kana mas'uul noqdo korjoogtaynta dejinta qorsheynta isticmaalka dhulka Jamhuuriyadda Federaalka oo idil.<br>h) Gudashada xil kasta oo kale oo uu xeerku u xilsaaro. | |
| | 3) Dhammaan hay'adaha dawladda heer kasta oo xukuumadeed waxaa waajib ku ah in ay Guddiga Madaxabannaan gacan ku siiyaan xilgudashadiisa waana in ay ilaaliyaan madaxbannanidiisa, dhex-dhexaadnimadiisa xurmada dhowrsanaantiisa, ahmiyaddiisa, lana qaato talooyinkiisa iyo soo jeedintiisa si waafaqsan xeerarka. | Faqraddani waxay faraysaa dhammaan hay'adaha dawladda heer kasta in ay Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka gacan ku siiyaan xilgudashadiisa, waana in ay ilaaliyaan madax-bannanidiisa, dhexdhexaadnimadiisa, xurmadda dhowrsanaantiisa iyo waxtarkiisa. |

| | | |
|---|---|---|
| | **Qodobka 44aad:**<br>**Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka** | **Qodob cusub** |
| | Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulku wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:<br>a) Min hal xubin oo matalaya Dawlad Goboleed walba;<br>b) Hal xubin oo matalaya Gobolka Banaadir; iyo<br>c) Shan xubnood oo ka imaanaya Dawladda Federaalka. | Faqraddan waxaa lagu nidaamiyey xubnaha Guddiga iyo meelaha ay ka kala imaan karaan. |
| | **Qodobka 45aad:**<br>**Shuruudaha Xubinnimada Guddiga** | **Qodob cusub** |
| | 1) Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannan ee Dhulka loo magacaabayo waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:<br>a) In uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda ; da'diisuna ka yareyn 40 sano;<br>b) In uu leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan;<br>c) In uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;<br>d) in uu leeyahay ugu yaraan 15 sano waaya-aragnimo maamul ama sharci ama injineeriyo ah.<br>e) In maxkamad si kama dambays ah aysan ku xukumin dambi ciqaabtiisu gaarsiisantahay 3 sano; | Faqraddani waxay xeerinaysaa shuruudaha laga rabo xubnaha Guddiga. |

| | | |
|---|---|---|
| | 2) Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka waxaa soojeedinaya Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso ee heer federaal iyo heer dawlad goboleedba, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne. | Faqraddani waxay nidaaminaysaa habka xubnaha Guddiga loo magacaabayo, oo ah in Golaha Wasiirradu ay soo jeediyaan oo la tashanaya hay'adaha ay khuseyso ee heerarka kala duwan. Kaddibna Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne. |
| **Qodobka 44aad:**<br>**Kheyraadka Dabiiciga ah** | **Qodobka 46aad:**<br>**Kheyraadka Dabiiciga** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| Qaybsiga kheyraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha Xubinta ka noqon doona Dawladda Federaalka Soomaaliya iyadoo loo marayo qaab Dastuuri ah. | 1) Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran waxaana looga faa'ideysanayaa qaab waara, oo badda iyo dhulkuba xammili karaan, oo aan wax u dhimayn shacabkana waxtar u leh. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u-habayn, iyadoo si cad loo muujiyey in kheyraadka dabiicigu uu yahay hanti qaran, loona isticmaalayo qaab waara una dhexeeya, kana faa'idaysta dhammaan shacabka. |
| | 2) Waxaa xeer lagu dhisayaa hay'ado u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in khayraadka dabiiciga ah looga faa'ideysto si aan badda iyo berriga dhulka wax u dhimayn oo waxyeellana ka ilaalinaysa hantida dabiiciga ah, hay'adahaas oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn:<br>a) Hay'adda Macdanta;<br>b) Hay'adda Biyaha; iyo<br>c) Hay'adda Betroolka; | **Faqrad cusub**<br>Ujeeddada faqraddan loogu soo kordhiyey waa in la caddeeyo wakaaladaha la dhisayo ee u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in kheyraadka dabiiciga ah looga faa'iidaysto si caddaalad ah.<br>Heshiikii Baydhabo ee 2018 wuxuu abuuray hay'adaha kala duwan oo maamulayo shidaalka. GMDHD wuxuu arkay in loo baahan yahay faqradda hagaysaa asaasidda hay'addaha maamulaya kheyraadka dabiiciga ah. |
| | 3) Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga waa in uu sugaa in dakhliga ka yimaada hantida dabiiciga ay si caddaalad ah u wadaagaan dawladda | **Faqrad cusub**<br>Heshiiska Federaalaynta Maaliyadda ay GWQ uu ku gaaray magaalada Baydhabo 2023, ayaa lagu go'aamiyey in la dhiso |

| | | |
|---|---|---|
| | Federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose ee Jamhuuriyadda. | guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga, sida ku xusan qaybta 6(2) ee Heshiiska.<br>Faqraddani waxay sidoo kale faraysaa in si caddaalad ah ay u wadagaan kheyraadka dabiiciga heerarka kala duwan ee Dawladda Federaalka Soomaaliya. |
| **Qodobka 45aad: Deegaanka** | **Qodobka 47aad: Deegaanka** | Magaca qodobkan waxba lagama beddelin |
| (1) Xukuumadda Federaalku waxay mudnaan siinaysaa ilaalinta, keydinta iyo dhawrista Deegaanka, iyadoo laga ilaalinayo wax kasta oo wax u dhimaya kala-duwanaanshaha noole ee dabiiciga ah iyo hannaanka deegaameed ee dabiiciga ah. | 1) Dhammaan heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda waxaa waajib ku ah ilaalinta, keydinta iyo dhowrista deegaanka, iyadoo laga hortagayo xaalufinta, wasakheynta, iyo waxyeello kasta oo kale. | Faqraddan ereyada "xukuumadda Federaalka" waxaa lagu beddeley ereyada "Hay'adaha awoodda u leh ee heerarka kala duwan ee Dawladda", taasoo lagu muujinayo in ay mas'uuliyad ka saaran tahay dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladda dhowrista iyo ilaalinta bii'adda. |
| (2) Dhammaan dadka kunool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo kobcinta Deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo Deegaankaba. | 2) Dhammaan dadka ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta, kobcinta deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo Deegaankaba. | Faqraddan sideedii ayaa loo qaatay. |
| | 3) Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyadu waa in ay:<br>a) Ilaalinayaan nidaamka ka faa'ideysiga dhulku wax u dhimayn, isticmaalka, maareynta, dhowrista deegaanka iyo hantida khayraadka dabiiciga ah;<br>b) U hawlgalaan sidii dalka loo gaarsiin lahaa in uu noqdo degaan dhulkiisu doogeysan yahay oo dhirtuna ku hagoogan tahay;<br>c) Shacabka ku wacyigeliyaan, kuna dhiirrigeliyaan ka qaybqaadashada | **Faqrad cusub**<br>Faqraddani waxay qeexaysa mas'uuliyadda dawladaha heer federal iyo heer dawlad goboleed ee ka saaran deegaanka sida ilaalinta iyo dhowrista deegaanka, sidii dalku u noqon lahaa mid doogeysan, wacyigelinta bulshada, ilaalinta isir-hayeenka iyo nafleyda.<br><br>**Isirhaynta** waxaa loo yaqaan afka qalaad "genetic resources" |

| | | |
|---|---|---|
| | maaraynta, ilaalinta iyo dhawraarinta deegaanka;<br>d) Ilaaliyaan ugaarta, isirhayeenka iyo nafleyda kala nooca duwan;<br>e) Dejiyaan nidaamyo qiimeeya ilaa heerka ay gaarsiisantahay saameeynta waxyeellada degaanka iyo u kuurgalka xaaladaha degaanka;<br>f) Ciribtiraan waxyaabaha degaanka halis ku ah;<br>g) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dib-unoolaynta, dib-udhiraynta, kor-u-qaadidda, ilaalinta degaanka, ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka Jamhuuriyadda.<br>h) Ka taxadaraan, kana hortagaan waxyeellada saamayn kara ama sababi kara isbeddelka cimilada. | |
| (3) Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee waxyeellada Deegaanku ay saameeyeen waa in ay:<br>(a) Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu dhaqangelinaayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay dhulka iyo biyaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(b) Dejiyaan sharci, qaaddaana tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah ee looga hortegayo ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; taasoo xeer-jebin ku ah qaanuunka dawliga ah iyo ku-xadgudub gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; | 4) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka hadba ay saameeynta waxyeelada deegaanku gaartey waa in ay:<br>a) Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu dhaqangalinaayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay dhulka ama badda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b) Soojeediyaan xeer oo ay xeeriyaan tallaabooyin deg deg ah oo lagama maarmaanka u ah ka hortagga wasakh ku daadinta iyo ku xabaalidda dalka, taasoo ah xeer jebin xeerka Dalka iyo ku xadgudub | Faqraddan waxba lagma beddelin nuxurkeedii, waxaase la sameeyey siiqeyn iyo toosin. |

| | | |
|---|---|---|
| (c) Qaaddaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa masuulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale;<br>(d) Qaaddaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah dib-u-noolaynta, dib-u- dhiraynta, kor-u-qaadidda iyo ilaalinta Deegaanka, iyo ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo Deegaanka dalka | gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo,<br>c) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa mas'uulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale. | |
| (4) Xukuumadda Federaalka iyadoo la tashaneysa Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay dejinaysaa siyaasad guud ee Deegaan ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. | 5) Baarlamaanka Federaalka Somaaliya ayaa soo saaraya xeer qeexaya mabaadi'da guud ee lagu daryeelo degaanka ee ku salaysan halbeegyo caalamiga ah ee lagu ilaalinayo, laguna dhowrayo deegaanka. | Faqraddani waxay tilmaamaysaa in BFS uu soo saaro xeer ku saabsan degaankaa oo qeexaaya mabaad'ii guud iyo halbeegyo lagu ilaalinaayo deegaanka si loo dammaanad-qaado in dhammaan Jamhuuriyadda loo ilaaliyo si isku mid ah. |

# CUTUBKA AFARAAD:
# MATALAADDA SHACABKA

Cutubkan wuxuu nidaaminayaa doorashooyinka wuxuuna ku dhisan yahay heshiiskii dooraashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran Maajo 2023. GMDHD wuxuu ku sameeyey taxliilin dhamaystiran heshiiska hannaanka doorashooyinka JFS ee uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ). Ayadoo laga duulayo heshiiska GWQ iyo daraasad badan uu Guddiga ka sameeyey axkaamta la xiriirta qodobbada heshiiska doorashooyinka, GMDHD wuxuu diyaariyey cutubkan 4aad oo ka kooban 15 qodob oo kulligood ay wada cusub yihiin marka laga reebo hal qodob, sidoo kale waxaa la tiray 1 qodob waxaana lagu soo kordhiyey afartan iyo shan (45) faqradood oo cusub, sidoo kale waxaa lagu soo kordhiyey laba madax oo kala ah Madaxada 3aad: Xisbiyada Siyaasadda; iyo Madaxa 4aad: Maamulka Doorashooyinka.

GMDHD wuxuu u nidaamiyey cutubkan sida soo socota:

1) Awoodda Shacabka;
2) Mabaadii'da Guud ee Doorashooyinka;
3) Nidaamka Doorashooyinka;
4) Hay'adaha Dastuuriga ah ee sida tooska ah loo dooranayo;
5) Muddada xilhaynta;
6) Cod bixiyaha;
7) Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed iyo Shuruudahooda; iyo
8) Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka, waajibaadkiisa, xubnahiisa iyo shuruudaha xubnaha.

GMDHD wuxuu heshiiskii GWQ u kala qaybiyey:

Qaybta 1aad: Qodobbo ka mid noqonaya Dib-u-eegista Dastuurka.
Qaybta 2aad: Qodobbo noqonaya Xeerarka.
Qaybta 3aad: Siyaasado iyo heshiisyo.

| CUTUBKA AFARAAD:<br>MATALAADDA SHACABKA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS .** | **FAALO:**<br>Faahfaahin iyo sharraxaad la xiriirta soojeedinta Wax-kabeddelka |
| **Cutubka Afaraad:<br>Matilaadda Shacabka** | **Cutubka Afaraad:<br>Matalaadda Shacabka** | Magaca cutubka waxba lagama beddelin |
| **Madaxa Koowaad:<br>Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka** | **Madaxa Koowaad:<br>Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 46aad: Awooda Shacabka** | **Qodobka 48aad: Awoodda Shacabka** | Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin |
| 1) Awoodda isxukunku waxay ka bilaabataa, kuna dhammaataa shacabka, asaga oo adeegsanaya awoodda ah in mar kasta oo loo baahdo uu hay'adaha iyo wakiillada shacabka ku oogi karo la- xisaabtan | 1) Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta iyo wakiillada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha. | Faqraddan waxa lagu sameeyey dib-u-habayn yar. |
| 2) Nidaamka matilaadda shacabku waa in uu ahaado mid furan oo qof kasta fursad u siinaya inuu ka qayb-qaato; habraacyadiisa iyo xeerarkiisana si fudud loo fahmi karo. | 2) Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato xukunka si toos ah ama si dadban, si fududna u fahmi karo xeerarkiisa iyo habraacyadiisa. | Faqradan waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn, iyadoo matalaadda heerarka kala duwan ee dawladeed ay noqoto mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddinkuna uu ka qeybgeli karo si toos ah iyo si dadban. |
| 3) Nidaamka matilaaddu waa inuu ahaadaa mid si ku filan oo macquul ah uga hortegi kara qalalaase ka dhasha tartanka siyaasadda iyo natiijooyinka doorashada. | 3) Nidaamka matalaaddu waa inuu ahaado mid ka hortegi kara qalalaase ka dhalan kara tartammada siyaasadeed iyo natiijooyinka doorashada. | Faqraddan waxba lagama beddelin nuxurkeedii, waa la soo koobay. |
| | 4) Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed | **Faqrad cusub** |

| | | |
|---|---|---|
| | kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. | Sababaha faqradda loogu soo kordhiyay qodobkan ayaa ah in DFS ay xaqiijiso nidaamka dimuqraadiyeed ee heerarka dawlad goboleed si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka JFS. |
| **Madaxa Labaad: Doorashooyinka** | **Madaxa Labaad: Doorashooyinka** | Cinwaanka madaxa waxba lagama beddelin |
| **Qodobka 47aad: Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada** | | **Qodobkan waa la tiray** |
| Shuruucda ku saabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | | **Qodobkan waa la tirtiray**<br>Nuxurkiisa oo faahfaahsan waxaa lagu sheegay qodobbada kale ee cutubkan 4aad. |
| | **Qodobka 49aad: Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka** | **Qodob cusub** |
| | Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo:<br>a) Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye;<br>b) Dammaanad qaada xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka, sida ku xusan qodobka 20aad ee Dastuurka;<br>c) Sugaya geeddisocodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba, uuna fulinayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; | Faqraddan waxay nidaaminayaa mabaadi'da guud ee doorashooyinka hagayaa, waxaana laga soo qaatay nuxurka heshiiskii Doorashooyinka ee uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran Maajo 27, 2023, mabaadi'da ku xusan heshiiska waa lix faqradood, waxaa loo rogay faqradahaas siiqo qaanuuni ah. |

| | | |
|---|---|---|
| | d) Dammaanad qaadaya in dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo ay leeyihiin xaqa dhiibashada codkooda si siman;<br>e) Sharci ku salaysan, geeddisocodkiisuna loo maareeyey, loona korjoogteeyey si madaxbannaan oo sugaya hab daahfuran oo isla xisaabtan leh;<br>f) Xaqiijinaya in aan lagu xadgudubin midnimada Jumhuuriyada iyo bulshada Soomaaliya;<br>g) Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh;<br>h) Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad bulsho;<br>i) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda; iyo<br>j) Ka hortagga hurinta colaadaha. | |
| | **Qodobka 50aad:**<br>**Nidaamka Doorashooyinka** | **Qodob cusub** |
| | Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqraddani waxay qeexaysaa hannaanka doorashooyinku in uu yahay mid ku salaysan qof iyo cod.<br>Xeer uu soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa qeexayaa |

| | | |
|---|---|---|
| | | faahfaahinta habka matalaadda isu-dheelitiran ee liiska xiran oo ku xusan Qodobka 1aad ee Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran ee la gaaray Maajo 27, 2023.<br>Fadlan eeg bogga 55aad ee warbixinta. |
| | **Qodobka 51aad:<br>Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo** | **Qodob cusub** |
| | 1) Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa:<br>a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare;<br>b) Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya ;<br>c) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka.<br>d) Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka; iyo<br>e) Golaha Degaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee Dawladaha hoose. | Faqraddan waxaa lagu nidaaminayaa dhammaan axkaamta la xiriirta dooorashada hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo dooranayo.<br><br>Nuxurka Qodobkan waxaa laga soo qaatay qodobbada 2aad, 3aad, 4aad, 5aad, 6aad iyo 7aad ee Heshiiska Golaha Wadatashiga Qaran uu gaaray Maajo 27, 2023. |
| | 2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Farqaddani waxay xeerinaysaa doorashada Golaha Shacabka ooay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha, waxaana laga soo qaatay qodobka 3aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 3) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya | Farqaddani waxay xeerinaysaa doorashada Aqalka Sare oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta degan dawlad goboleedkasta oo buuxiyey shuruudaha, |

| | | |
|---|---|---|
| | muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | waxaana laga soo qaatay qodobka 4aad, oo lala akhriyey qodobka 2aad ee Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 4) Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan; | Farqaddani waxay xeerinaysaa doorashada Madaxweynaha JFS iyo Madaxweyne Ku-xigeenka oo ay ku dooranaayaan dhammaan muwaaddiniinta JFS ee buuxiyey shuruudaha, waxaana laga soo qaatay qodobka 7aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 5) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleed kasta; waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Farqaddan waxay xeerinaysaa doorashada Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku xigeenka Dawlad Goboleedka oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta degan dawlad goboleed kasta oo buuxiyey shuruudaha, waxaana laga soo qaatay qodobka 8aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 6) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleed kasta waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Farqaddani waxay xeerinaysaa doorashada Golaha Wakiillada oo ah hal degaan doorasho heer dawlad goboleed kasta ah oo ay dooranayaan dhammaan muwaaddiniinta degan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha, waxaana laga soo qaatay qodobka 5aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 7) Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku | Farqaddan waxay xeerinaysaa doorashada dawladaha hoose oo ah hal deegaan-doorasho heer deegaanada degmooyinka ah |

| | | |
|---|---|---|
| | dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye. | oo ay dooranayaan muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye., waxaana laga soo qaatay qodobka 6aad oo lala akhriyey qodobka 2aad ee heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | **Qodob 52aad: Muddada Xilhaynta** | **Qodob cusub** |
| | 1) Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka **51**aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano. | Faqraddani waxay nidaaminaysaa muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska loo dooranayo, wuxuuna qeexaya in 5 sano ay tahay dhammaan muddada xilhaynta, waxaana laga soo qaatay nuxurkii heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran. |
| | 2) Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, sida ku qeexan xeerka doorashooyinka. | Fiiri faallad faqradda 1aad ee qodobkan. |
| | **Qodob 53aad: Codbixiyaha** | **Qodob cusub** |
| | 1) Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo. | Faqraddan waxay xaqiijinaysaa xaqa diiwaangelinta muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo oo gaaray 18 sano. |
| | 2) Codbixiyeyaasha diiwaangashan waxay, si siman, xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada | Faqraddan waxay tilmaamaysaa in dhammaan codbixiyeyaasha diiwaangashan, si siman, ay xaq ugu wada |

| | | |
|---|---|---|
| | codkooda, waana in la ilaaliyo rabitaankooda iyo kalsoonidooda. | leeyihiin dhiibashada codkooda, ayadoo la ilaalinayo rabitaankooda iyo kalsoonidooda. |
| | 3) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu masu'uul ka yahay diiwaangalinta isagoo diyaarinaya diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Diiwaanka codbixiyeyaasha JFS wuxuu aad ugu muhiim yahay hannaanka doorashooyinka, sidaas darteed faqraddani waxay qeexaysaa in Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinku uu diyaarinayo diiwaankaas, uuna diiwaangalinayo codbixiyaasha. |
| | 4) Dadka aan xaqa u lahayn diiwaangelintu waa:<br>a) Dadka aan dhimirkoodu dhammayn;<br>b) Qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama danbays ah oo la xiriira dembi doorasho shantii sano ee la soo dhaafay ama maxkamaaddaasi ay ka mamnuucdo xaqa codaynta, ama dembi uu galay awgeed xabsi uu ku jiro. | Faqraddani waxay nidaaminaysaa dadka aan xaqa u lahayn diiwaangelinta. |
| | **Madaxa Saddexaad:**<br>**Xisbiyada Siyaasadeed** | |
| | **Qodobka 54aad:**<br>**Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed** | **Qodob cusub** |
| | 1) Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda. | Faqraddan waxaa laga soo qaatay Heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023.<br>Faqradda 1aad ee Qodokan: waxaa loo soo kordhiyey si loo xaqiijiyo dowrka xisbiyada siyaasadeed ee doorashooyinka iyo in ay yihiin tiir ka mid ah tiirarka nolosha siyaasadda JFS. |

| | | |
|---|---|---|
| | | Fadlan eeg cilmibaaris ku saabsan xisbiyada siyaasadeed, ee ku xusan bogga 59aad ee warbixinta |
| | 2) Xisbiyada siyaasadeed, ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah, waxay ka mid yihiin tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda Jamhuuriyadda. | |
| | **Qodobka 55aad:**<br>**Shuruudaha Xisbiyada Siyaasadeed** | **Qodob cusub** |
| | 1) Xisbi Siyaasadeed kasta waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:<br>a) In uu ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeyaa, horumariyaana midnimada Jamhuuriyadda;<br>b) In uu u hoggaansamaa Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo talinta sharciga;<br>c) In uu u taagan yahay xurmaynta, qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha;<br>d) In uu u hoggaansamaa mabaadii'da dimuqoraadiyadda iyo maamul wanaagga;<br>e) In uu xaqiijiyaa matalaadda dadweynaha oo loo dhan yahay siiyaanna mudnaan gaar ah beelaha laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah ay ku leeyihiin xubinnimada iyo hoggaamintaba;<br>f) In uu siiyo mudnaan gaar ah haweenka; | Faqraddan waxaa loo soo kordhiyey in la dejiyo nidaam guud dastuureed oo lagu nidaaminayo arrimaha xisbiyada siyaasadeed. Tani waxay lagama maarmaan u tahay axsaab siyaasadeed oo mustaqbalka la filaayo in ay ka hirgalaan dalka, GMDHD wuxuu u arkay in lagama marmaan tahay in lagu dhaqo xisbiyada siyaasadeed halbeegyo dastuuri ah oo qeexaya shuruudaha asxaabta siyaasdeed laga rabo. |

| | | |
|---|---|---|
| | g) In uu maraa habraaca diiwaangelint xisbiyada iyo xurmaynta xeer dhaqanka xisbiyada siyaasadeed. | |
| | 2) Waxaa reebban xisbi kasta oo:<br>a) Qarsoodi ah, qaab ciidan ama ciidan u yaalle ah ama u abaabulan colaad si ujeeddooyinkiisu ku gaaro, ama u hubeysan in xukun ku qabsado, ama leh magac ama astaan qabiil;<br>b) U ololeeya kala goynta dalka; iyo isku dirka bulshada.<br>c) Adeegsada maaliyad ka timid ilo aan sharci ahayn, iyo<br>d) Adeegsada hanti dawladeed ama la yimaada fal laaluush iyo musuqmaasuq, si uu u gaaro dano gaar ah. | Faqraddani waxay xeerinaysaa dhammaaan xisbiyada ka mamnuuc ah dalka gudihiisa. |
| | **Qodobka 56aad:<br>Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed** | **Qodob cusub** |
| | 1) Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed ee ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha; | Waxaa laga soo qaatay heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023.<br>Qodobkn oo ka kooban laba faqradood.<br>Faqradda kowaad waxaa lagu nidaamiyey ururrada siyaasadeed ee ka qayb gali kara tartanka doorashooyinka goloyaasha degmooyinka, si waafaqsan qodobka 6aad ee Heshiiska GWQ. |
| | 2) Labada urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka, | Si waafaqsan Qodobka 3aad, 5aad iyo 1aad ee heshiiskii GWQ, wuxuu nidaaminayaa tirada ururrada siyaasadeed ee ka qaybgali kara Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka xafiiska Madaxweynaha iyo Madaxweyne |

| | | |
|---|---|---|
| | Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta. | kuxigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta. |
| | **Madaxa Afaraad:<br>Maamulka Doorashooyinka** | **Madax Cusub** |
| | **Qodobka 57aad:<br>Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha** | **Qodob cusub** |
| | Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimahaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntoodaba heer kasta, si loo helo doorashooyin hufan, daahfuran oo xor iyo xalaal ah. | Faqraddani waxay dhisaysaa Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka, waxaana laga soo qaatay qodobka 12aad ee heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023. |
| | **Qodobka 58aad:<br>Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha** | **Qodob cusub** |
| | Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxaa xilkiisa iyo waajibaadkiisa ka mid ah:<br>a) in uu maamulo, la socdo, xaqiijiyo habsami u socodka, xalaalnimada iyo hufnaanta, doorashooyinka heerarka kala duwan ee dawladda iyo in uu ku dhawaaqo natiijada doorashooyinka.<br>b) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo codbixiyeyaasha doorashooyinka oo dhan. | Faqraddan waxaa laga soo raray qodobka 111E iyo qodobka 111G ee Asalka Dastuurka KMG ah.<br><br>Waxaana lagu sameeyey siiqayn iyo kaabid xarfaha qaarkood.<br><br>Ujeeddada halkana loogu soo raray waa in dhammaan qodobada doorashooyinka la xiriira halkaan la keeno, oo ay ugu horreyso |

| | | |
|---|---|---|
| | c) in uu diyaariyo, abaabulo, fududeeyo, qabto heerarka kala duwan doorashooyinka guud.<br>d) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta doorashooyinka guud ee heerarka kala duwan.<br>e) in uu soohdimeeyo degaan doorashooyinka, si xilliyeysanna u asteeyo xarumaha codbixinta;<br>f) in uu dejiyo hab dhaqanka doorashooyinka ee murrashaxiinta iyo xisbiyada siyaasadda;<br>g) in uu cayimo tirada iyo goobaha codbixinta ee dalka;<br>h) in uu diyaariyo, maamulana agabka doorashada iyo goobaha codbixinta;<br>i) in uu sameeyaa daraasad iyo khariidado la xiriira astaynta soohdimaha deegannada, asagoo kaashanaya khuburro.<br>j) in uu u soo jeediyo tallooyin Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sidii loo soohdimeeyo xuduudaha deegannada, asagoo tixgelinaya xogta: dadka, dhulka, xaaladda siyaasadeed iyo kan dhaqan, si uu baarlamaanku go'aan uga gaaro arrimaha xuduudaha;<br>k) in uu fuliyo hawl kasta ee kale, oo la xiriirta arrimaha doorashooyinka iyo soohdimaha, oo ku xusan Dastuurka | maamulka doorashooyinka oo mas'uul ka yahay Guddigu. |

| | | |
|---|---|---|
| | ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
| | **Qodobka 59aad: Xubnaha Guddiga Madaxabannaan Doorashooyinka iyo Soohdimaha** | **Qodob cusub** |
| | 1) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 15 xubnood, oo uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne. | Faqraddani waxay dhisaysaa Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka, waxaana laga soo qaatay qodobka 12aad ee heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023.<br><br>Faqraddani waxay nidaaminaysaa xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka, waxaana laga soo qaatay nuxurka qodobka 12aad ee heshiiska Doorashooyinka ee Golaha Wadatashiga Qaran oo uu gaaray 2023.<br>GMDHD wuxuu u arkay in lagu koobo in xubnaha ay yihiin 15, wuxuuna soo jeediyey in lagu daro xeerka doorashooyinka faahfaahinta ku saabsan meelaha ay ka kala imaanayaan. |
| | 2) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga, kaddibna waxaa meelmarinaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraaddani waxay xeerinaysaa habka magacaabista Guddoonka guddiga. |

| | Qodobka 60aad:<br>Shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha | Qodob cusub |
|---|---|---|
| | 1) Xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudahan soo socda:<br>a) in uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya; da'diisuna ka yareyn 40 sano;<br>b) in uu leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan;<br>c) in uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;<br>d) in uu leeyahay ugu yaraan 10 sano waaya-aragnimo maamul ama sharci; | Faqradda waxay nidaamineysaa shuruudaha xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha |
| | 2) Xubinnimada Guddiga looma magacaabi karo dadka soo socda:<br>a) Qof ka tirsan xisbi siyaasadeed;<br>b) Qof ay maxkamad ku ridday xukun kama danbays ah oo ay ciqaabtiisu gaarsiisan tahay 5 sano;<br>c) Qof kasta oo ka haya xil dawladeed hay'adaha dawladda ee heer federal iyo heer dawlad gobaleed xilliga magacaabista ama lixdii bilood ee ka horreysay,<br>d) Qof kasta oo uu ka mamnuuco xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraddani waxay xeerinaysa dadka aan ka mid noqon karin Guddiga doorashooyinka. |

| | **Qodobka 61aad: Muddada Xilhaynta Xubnaha Guddiga** | **Qodob cusub** |
|---|---|---|
| | Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn, ayadoo kala bar xubnaha la magacaabayo saddexdii sanaba hal mar si waafaqsan xeerka Guddiga lagu dhisay. | Faqraddan waxay nidaamineysaa muddada xilhaynta Guddiga.<br>GMDHD wuxuu sameeyey cilmibaaris ku xusan warbixinta guud. Habka ay ku kala horrenayaan xubunuhu waxaa lagu caddeynayaa xeerka lagu dhisayo Guddiga. Habkaas uu sheegi doono xeerku wuxuu noqon karaa:<br>(a) In la magacaabo kala bar xubnaha, kaddibna saddex sano lagu soo daro xubnaha dhimman: Laba xubnood oo ay soo magacaabeysa Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo ay soo magacaabayaa Dawlad Goboleedyada iyo xubin Gobolka Banaadir laga soo magacaabayo.<br>(b) In hal mar la magacaabo dhammaan xubnaha, kaddibna loo qori tuuro kala bar inta baxaysa. |
| | **Qodobka 62aad: Xil-waayidda Xubnaha Guddiga** | **Qodob cusub** |
| | Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan oo keliya arrimaha soo socda midkood:<br>1. Geeri;<br>2. Istiqaalad qoraal ah oo uu u gudbiyey Guddiga lagana aqbalo;<br>3. Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay; | Qodobkan wuxuu nidaamineyaa asbaabta xubnaha guddigu ay xilkooda ku waayi karaan. |

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Xukun maxkamadeed oo kama danbays ah;<br>5. Aqbalaada xil kale oo dowladeed;<br>6. Muddada xil haynta oo dhammaataa; iyo<br>7. Arrin kasta oo kale lagu xuso dastuurka dhexdiisa ama xeerarka kale ee Jamhuuriyadda. | |

GMDHD

ICRIC